
SHEEKADII
ROBINSON
KURUUSOW
Taxanaha Xiddigta
(ROBINSON CRUSOE)

**ROBINSON KURUUSOW**

**Taxanaha Xiddigta**

**oo soo baxa bil kasta, ujeeddadiisuna tahay inuu aqoonta gaarsiiyo dadweynaha.**

**Muqdisho, — 1da Agoosto 1980.**

# SHEEKADII

# *ROBINSON*

# *KURUSOW*

**1da AGOOSTO**

*1980*

PR
3403
.S7
A34
1980

W. T. Axmed Faarax Cali (Idaajaa)

AU

# SHEEKADII

# ROBINSON KURUSOW

Ida AGOOSTO

1980

RSCH
HFE5671

W. T. Axmed Faarax Cali (Idaajaa)

# HORDHAC

Faa'iidada uu leeyahay akhrisku waxa og nin wax bartay, kan aan nasiibka u helinna ciil-kaambe kuma yara kolka ay ku timaaddo baahida akhrisku. Guud ahaan dadweynaha Soomaaliyeed wuxuu faa'iidada wax akhriska dareemay markii uu dalka dhammaantiiba saameeyey Ololihii la dagaallanka aqoondarrida iyo qoraalkii afka Soomaaliga.

Qoraalkii Afka Soomaaligu wuxuu shacbiga Soomaaliyeed awood u siiyey inay dad badan, oo magaalo iyo miyiba ku nooli fursad u helaan, inay dhab ahaan u bartaan dhulkooda iyo inay aqoonta iyo dhaqammada kale geddisan ee adduunka kale.

Buuggan Roobinson Kuruusow, oo aan hubno in uu akhriskiisu u faa'iideynayo yar iyo weynba dadweynaha Soomaaliyeed, waxa lagu qoray afaf tiro badan; wuxuu yahay buug taariikh-leh ilaa iyo haddana gaboobi la'. Sidaas awgeed ayaa Maamulka Xiddigta Oktoobar ku kalliftay in uu af Soomaali ku tarjumo, si dadweynaha Soomaaliyeed ee weli u ooman wax akhriska ay uga faa'iideystaan waxtarkiisa.

Wuxuu Maamulka Wargeyska Xiddigta Oktoobar sii wadi doonaa tarjumaadda iyo daabacaadda buugaagta xiisaha leh ee ku qoran afafka qalaad iyo kuwa kale ee aannu is-niraahno waxay wax ku kordhinayaan dadweynaha Soomaaliyeed.

XIDDIGTA OKTOOBAR

# ARAR

«Mar haddaynaan kutubta ka maarmayn, akhriskuna uu lamahuraan inoo yahay, waxaa jira kitaab aan u haysto inuu yahay kutubta kuwa ugu qiimaha weyn, siiba markii la eego dhinaca waxbarashada madaxa bannaan ee dabiiciga ah. Wuxuu noqon doonaa kitaabka ugu horreeya ee uu akhrisan doono wiilkayga «Emile», dabadeedna isaga oo keliya ayay rugta kutubtiisu ka koobnaan doontaa. Wuxuu ku arki doonaa waxyaabo aad iyo aad u wanaagsan oo, kolka dambe, ku qasbi doona inuu wax walba oo kale ka jeclaado.

Qaybtaas aqooneed markii la eego, tiirdhexaad ayuu kitaabkaasi u yahay, isaga ma ahee kutubta culuunta dabiiciga ah ee kalena waxay noqanayaan faallo iyo faahfaahin isaga laga bixinayo. Waa qiyaasta ugu runta badan ee aynu ku qiyaasi karayno kolba guusha aynu nolosha ka soo hoyno, isla markaasna waa waxa aynu ku cabbiri karayno kolba ra'yiga aynu soo banbixinayno. Inta aynu leennahay dhadhan aan daxalaysan, kitaabkaasi wuxuu weligii ahaanayaa mid kol kastoo aynu akhrisanno inoo cusub, inoona macaan.

Malaha waa kitaabkii «Aristotal» ama waa kii «Buffon»? Ha ka yaabin!! Midna ma ahee, waa kitaabka
Waa tahaye, tolow waa kitaabkee ?
«ROBINSON CRUSOE».

Jean Jacques Rousseau

# *Tabaabushihii Safarka*

## 1 REER «ROBINSON»

Sannadkii 1632kii ayay dhalashadaydu ku beegnayd, waxaanna ku dhashay magaalada «YORK» ee uu aabbahay ka dhigtay waddankiisii labaad, ka dib markuu ganacsigiisii ku ballaartay, kagana faa'iidey, xoolo badan oo nolol wacan u soo jiideyna uu ka kasbaday.

Xaaskayagu wuxuu ka koobnaa aabbahay oo gaboobey, hooyaday oo iyana gabowday iyo saddex wiil oo ay dhaleen, aniguna aan u yaraa.

Walaalkaygii noogu weynaa waxaa lagu diley goob dagaal, kii dhexana wuxuu u socdaalay meel aanan aqoon, markaasaa noogu dambeysey, warkiisiina naga go'ay, dabadeedna war iyo wacaal toona kama aannan helin.

Markaasuu aabbahay aad ugu dedaaley waxbarashadayda, si fiican buu ii koriyey, had iyo jeerna wuxuu ii soo jeedin jirey waanooyinkiisa dhaxalgalka ah. Wuxuu ii dooray inaan sharciga ku xeel dheeraado, ha yeeshee

anigu ma jeclayn, naftayduna way ka sii jeedday.

## 2. JACAYLKA DALXIISKA

Dalxiisku wuxuu ahaa wixii aan goor iyo ayaan ku riyoon jirey. Wuxuu ahaa wixii aan maalin iyo habeenba u boholyoobi jirey. Dalxiiska iyo dhoofka badda ayaa naftaydii dhan walba ka hareereeyey, markaasaan maqli waayey wax canaan ah ama waano ah oo arrintaas la iiga soo jeediyo. Waxay ahayd arrin iga adkaatay oo laf iyo ludba iga gashay, sidaas daraaddeedna, uma dheg raaricin waanadii aabbahay, baryadii hooyaday iyo soo-noqnoqoshadii qaraabada, giddigood wayga quusteen, markay i soo loodin waayeen oo ay arkeen inaanan marna ka noqonayn.

Aabbahay wuxuu ahaa waayeel waayo-arag ah oo haddana abwaan ah, aniguna waan jeclaa, waana maamuusi jirey.

Subax subaxyada ka mid ah ayuu qolkiisa iigu yeeray, maxaa yeelay ma uu socon karin oo qallal dhaqaaqii u diiday ayaa ku dhacay. Astaamaha ciilka iyo murugadu isagoo ay wejigiisa ka muuqdaan ayuu igu yiri:

«War waa maxay waallida kuu horseedaysaa inaad naga tagto ? Waa maxay waallida inaad nala joogto ku nacsiinaysaa? Maxaa kaa wadaya nolosha qabow ee wacan ee aad ku haysato aqalkii aad ku kortay iyo dalkii aad u baratay oo aad u jeclaatay? Raaxada aad haysato maxaad dhibaato ugu doorsanaysaa? Maxaadse naftaada ugu bandhigaysaa halista badaha iyo daalka socdaalka? War booy ! Ilaah baa jidkii nolosha kuu fududeeyey oo cayshad muuno leh kuu diyaariyey. Alla kuu roonaa inaad wixii laguu qoray ku raalli noqotid! !. Alla kuu wanaagsanaa barwaaqada uu gaarka kuu siiyey inaad ugu

mahad naqdo oo aad meel fariisatid!!. Waxaadse ogaataa haddii aad madax adkaantaada ku sii socotid oo aad oggolaatid waallida socdaalka kuu horseedaysa, waxaad ogaataa inaad iga caraysiinayso, hooyadaa aad ka caraysiinayso, dabadeedna aad kaga caraysiinayso Ilaaha weyn-ee ku faray inaad waalidkaa baarri u noqoto».

## 3. HABAAR LA AQBALAY

Muddo dheer ayuu aabbahay marna igu qaylinaayey, marna hadalka ii debcinaayey oo ii maahmaahayey. Markay waanadii iyo wax-u-sheeggii ka idlaadeen ayuu, ugu dambaystii, ku soo gabagabeeyey.

«Wiilkayow, xusuuso inaan waayey walaalkaagii weynaa



markii dagaalka lagu dilay oo aan waayey walaalkaagii dhexe ee isagu socdaalka ku adkeystay sida aad hadda ugu adkeysanayso, war iyo wacaalna aanan ilaa hadda ka haynin. Ma ogin: Ma nool yahay, ma dhintay? Adiga ayaa waraso nooga haray, adigaana wax walba noo ah. Haddiise aad nagu madax adkaato oo aad socdaalkaa ka laaban weydo, waxaan kuu sheegayaa inaan Ilaah kula jiri doonin oo aadan safarka ka helayn wax aan daal iyo guuldarro ahayn».

Eraygaasi wuxuu dhabtii ahaa kuhaan run ah iyo habaar la aqbalay, maxaa yeelay madax-adeygeygii waxaan kala kulmay guuldarro aan weli ruux iga horreeyey la soo gudboonaan.

## 4. KA BAAQASHADIISII SOCDAALKA

Codka aabbahay wuxuu lahaa gariir naxariis leh ilmaduna indhihiisa ayay ka soo daadaneysey, murugadiisuna waxay sii darraatay kolkii uu ii sheegay geeridii walaalkeygii noo weynaa iyo kii dhexe oo beri hore naga ambaday, warkiisiina naga go'ay. Eray kasta oo uu ku dhawaaqaba waxa iiga muuqanayey jaceylka uu ii hayo, markaasaan awoodi kari waayey inaan mar dambe waanadiisa dabamaryeeyo, waxaanna u ballanqaaday inaan socdaalka iska dhaafayo oon ka baaqanayo. Waxaan goostay inaan dalkayga iska joogo, anigoo taladiisa u hoggaansamaya, amarkiisana addeecaya.

## 5. BALLANFURYO

Muddo yar kaddib ayuu jaceylkii socdaalku igu soo laabtay oo waxan is-arkay anigoo jeel darani ii hayo dhoofka iyo fuullaanka badaha. Markaas baan illoobay ballankii aan aabbahay ka qaaday, dabadeedna waxaan kaashaday khidad aanan ku guuleysan. Maalin maalma-

ha ka mid ah ayaan arkay hooyaday oo faraxsan wejigeedana reynreyni ka muuqato. Waxa ii muuqatay inaan taas ka faa'iideysto oo aan u bandhigo jaceylka safarka ii haya, kana baryo inay ii oggolaato. Si qabow oo wacan ayaan ugu macneeyey sababaha socdaalka igu jiidaya oo ah inaan indhahayga ku soo arko dalal adduunka ah ee inta badan la iiga sheekeeyey. Waxaan u muujiyey iney fikradda socdaalku maankayga ka saayid caleysay oo aanan wax kale qaban karin, una suubban, jeer aan fulinteeda ku guuleysto. Waxaan hadalkaygii ku soo gabagabeeyey :

«Waxaadna ogaataa haddii aan adiga iyo aabbahay oggolaansho ka waayo, inaan oggolaansho la'aan socdaalayo, hana illoobin inaan maanta 18 jir ahay oo aan ahay nin garaad leh, isaguna isu taliya. Ha yeeshee, waxaan wanaag bidayaa inuu aabbahay socdaalka ii oggolaado».

## 6. DHIRIFKII WAALIDKIIS

Mar alla markay hooyaday hadalkaas maqashay ayay aad iigu carootay oo igu tiri :

«Marna nama dhacsiin kartid fikraddaas aan ka fiirsiga lahayn ee wax aan aayo-xumo ahayn aan kuu soo jiideyn, aabbahaana kuu oggolaan maayo inaad naftaada haadaan ka tuurtid».

Kolkii ay aabbahay u tebisay wixii aan ku goostayna intuu carooday oo ciishooday, ayuu ku yiri: «Waxay ila tahay inay guuldarro u qoran tahay inankaas nasiibka daran. Socdaalkiisa wuxuu kala kulmi doonaa guuldarrooyinka la soo gudboonaada inay yihiin ciqaab uu mudan yahay oo kaga timid waanadii uu waalidkiis u soo jeediyey oo uu diidey. Anigana qalbigaygu ii oggo-

laan maayo inaan ka qayb galo fududeynta guuldarroo-yinkiisa».

Hal gu' markii ay maalintaas ka soo wareegtay ayaan gurigii ka baxsaday, anigoo socdaal ku goostay, ka dib markay suurtoobi weydey iney waalidkay ii oggolaadaan.

Waxaan ka yaabbanaa sababta ay isugu kay dhejinayeen oo ay u jeclaayeen inaan la joogo. Xilligaas ma aan garanayn waxa ay waayuhu ii qarinayeen oo dhibaato iyo balanbal ah.

# *Fasalka Koowaad*

# GUULDARROOYINKA BADDA

## 1. KOWDII SIBTEMBAR

Wax la yaab leh oo aanan ku tashan ayaa maalin maalmaha ka mid ah ii hor kacay magaalada «Hell», taasoo aanan markaas damacsanayn inaan ku socdaalo, maskaxdaydana ku jirin.

Jidka dhexe anigoo maraya ayaan la kulmay saaxiibbaday mid ka mid ah. Markaan salaantii isdhaafsannayna waxaan sheekadiisii ka ogaadey inuu isu diyaarinayo socdaal uu London ku tago. Wuxuu igu martiqaaday inaannu doonta aabbihiis ku wada dhoofno, aniguna waxaan taas u qaatay fursad aan la iska lumin oo kharash la'aan aan dantayda ku fushan karo. Jacaylkii badda ayaa iga saayid caleeyey, markaasaan wax walba illoobey. Uma dan gelin oggolaansho aan aabbahay ka helo, halka ay arrimuhu ku biyo shuban doonaanna kama aan fekerin.

Sidaas baan badda ugu dhoofay ... haddii aan wax walba illoobana marna ma illoobi karo maalintaas aan dhibaatadan u bareeray. Maxaa yeelay waxay ahayd maalintii waayaha noloshayda ugu nasiibka darrayd, isagoo ahaa bilowgii xilliga guuldarrada. Waa maalinta ku tilmaaman kowdii Sebtembar 1651kii.

## 2. SOO DHICIDDII DUUFAANTA

Mar alla markay doontii badweyntii ku dhex dhaqaaq maagtay ayaan arkay mawjadihii oo isgeddiyaya oo mar walba soo xoogoobaya. Waxay ahayd maalintii iigu horreysey maalin aan badda dul tago, markaasay cabsiyi i buuxisay oon argagaxay oo aan dareemay inay aakhiradaydii soo dhawaatay. Mar qura ayaan xusuustay waanooyinkii waalidkay iyo dadkaygii, waxaana igu soo dhacay erayadii hooyaday igu daldalaysay, iyadoy ilmadu xirribaheeda ka soo dililiq leedahay. Waxaan laabta gashaday inay duufaantani tahay ciqaab garsoor leh iyo abaalgud aan mudnahay.

Baddii baa cirka isku shareertay, hugunkeediina wuu sii kordhay, waxaanna arkay duufaantii ba'nayd oo kolba geeri xun noogu dhaaranaysa, hirkiina wuxuu u ekaaday mid na wada liqi doona. Isma oran geeri baad ka baxsanaysaan, markay ila ahaatay inay doontu kolba degeyso ilaa ay gunta badda soo taabato. Markaas baan Ilaah nidir ka galay inaanan inta aan noolahay mar dambe bad soo aadin, haddii aan maanta geeri ka baxsado. Waxaan Ilaah ka baryey inuu i nabad geliyo, si aan waalidkay ugu laabto, anigoo toobad-keen ah oo ka qoomamaysan caasinnimadaydii iyo amar diiddadaydii, uguna dhaar maro inaan ka yeelayo wax alla wixii ay i faraan.

Maalintii labaad ayay hawadii soo hagaagtay oo baddii camal samaatay. Waxaan is arkay anigoo u ba-

ranaya oo aan cabsi badani igu jirin, in kastoo aanan weli wareerkii shalay ka biskoon.

Kolkay habeen noqotay oo ay qorraxdii dhacday, daruurihiina ay naga dul dhaqaaqeen ayey quruxdii baddu soo ban baxday, bilicdii abuurtuna si la yaab leh isu muujisay. Maalintii xigtayna waxa nagu soo dhacay neecow fudud oo wacan, markaasay baddii u ekaatay muraayad sifeysan oo abuurtii u muuqatay sidii wax ciidaya, maalintaas waxyaalihii aan quruxda badda ka arkay waxay i illowsiiyeen hugunkii iyo dhibaatadii aan shalay kala kulmay, markaasaan hilmaamay nidirkii aan Ilaah ka galay, wacadkii aan nafteyda ka qaaday ! !.

Markaasaa saaxiibkey ii yimid oo intuu garabka iga taabtay yiri: «Bal warran hadda! Alla saaxiib maxay baddu ku argagixisay ! ! Waxaa kugu habboonaa inaad geesinnimo isgelisid. Cabsi iyo naxdin ayaa kaa meel waayey markey neecawda fududi shalay badda nooga soo dhacday». Markaas baan ku iri, anigoo yaabban: «Sidee baad neecow ugu magacaabeysaa? Ma waxaa neecow ahayd duufaantii ba'nayd ee argagaxa lahayd?». Markaas buu yiri:

«Sidee baad adigu duufaan ugu magacaabeysaa ? Alla miskiinsanidaa! Waxay ahayd neecow fudud oo maalin walba naga hor timaadda, annana aan ku jeesjeesno. Weligaa taas oo kale ha ka argagixin. Xusuusnow inaad nin rag ah tahay, ninka ragga ahna looga baahan yahay inuu geesi noqdo» ! !.

### 3. MAALINTII SIDDEEDAAD

Badda degganaanteedii iyo quruxdeedii ayaan ku illoobey dhibaatooyinkii aan soo arkay iyo naxdintii aan la kulmay. Bilicda abuurta ayaa wax walba iga jeediyey,

wax walboo kalena iga ilduufiyey. Toddoba cisho iyadoon weli iigu dhammaan ayey nafteydii nolosha badda u guuxday, dadkaygii qofna mar dambe sooma xusuusan, waanooyinkoodii oo dhanna waan iska hilmaamay. Maalintii siddeedaad subaxnimadii ayay dabayshii xoog ba'an la soo baxday oo u soo dhacday si aan wax loo dhigo la arag. Welwel iyo naxdin ayaa ka muuqda wejiyada badmareennadii doonta, markaasey shiraacyadii soo dejiyeen, isuna diyaariyeen iney halista soo socota ka fool ka fool uga hor tagaan. Duhurnimadii ayaa hugunkii baddu soo kordhay, markaasay quusi si tartiib tartiib ah noogu baahday. Waxaan maqlay naakhuudihii doonta oo ahaa nin geesinnimada looga daydo oo cod gaaban naftiisa kula faqaya, «Ilaahow naxariistaada noogu deeq! Annaga oo dhan waannu halligannay, adiga mooyee meel kale oo aan u cararnaana ma jirto !».

Argagax iyo cabsi baa nafteydii ka buuxsamay markaan arkay mawjadihii oo sidii buuraha oo kale cirka isku tolaya, ilbiriqsi walbana dusha nooga soo dhacaya, kolkaasaan u qaadannay inay na liqeen. Waxaan aragnay doonyihii agtayda marayey oo dhibaatada na haysata mid la mid ahi ay haysato, meel noo dhowna doon weyn ayeyba baddu ku liqday.

Habeenku markuu laba isku dhigay ayaa badmareennadii mid ka mid ah qeylo ka soo yeertay, isagoo saaxiibbadiis gargaar iyo caawimaad ka dalbaya, show doontii baa dalooshantay ! ! ! Waannu ku orodnay, mise waa dalool weyn oo ay biyihii xoog uga soo gelayaan. Waxaan iska wada kaashannay sidii aannu doonta biyaha uga wada saari lahayn. Isla markaasba, doonyihii noo dhowaa mid ka mid ah ayaa madfac oodda ka qaadday, iyadoo gurmad iyo hiil u qayshanaysa, aniguna markaas baan miyir beelay, cabsi daraaddeed ! !.

Muddo dheer haddaan miyir la'aa ayaan soo baraarugay, markaasuu naakhuudahayagii riday madfac habarwacad ah. Wax yar ka dibna doon yar baa inta soo dhowaatay noo soo gurmatay, waxayna noo daadgureysay markab aan naga fogeyn, ha yeeshee, annagoo daal baaba'nay ayaanu dushiisa tagnay.

Daqiiqado aan badneyn ka dib waxaan arkeynay doontayadii oo badda ku sii hafanaysa, waxaannuna soo marnay waqti dheer oo aannu ilbiriqsi kasta halis ba'an gebiga u saarrayn. Ugu dambeyntii, xeebtii ayaannu nimid, ha yeeshee waxaannu nimid mar uu itaalkii naga idlaaday oo aannu nabadgelyo ka quusannay.

## 4. KA BAXSIGII HAFASHADA KA DIB

Waxaa ii ekayd inaan nidirkaygii ka soo baxo oo aan dadkeygii u noqdo, anigoo toobad keen ah oo ka qoomameysan gefkii iga dhacay, mar hadduu Ilaah hafashadii iga nabad geliyey.

Ha yeeshee fudeydka carruurnimada ayaa ii diidey inaan fikraddaas wacan ku dhaqaaqo. Waxaa ii muuqday dadkii oo igu wiirsanaya, iguna jeesjeesaya oo ka sheekeysanaya dhibihii iga soo gaarey socdaalkaas nasiib-xumada lahaa. Waxaan u qaatay haddii aan dadkeygii ku laabto in aan noqonayo wax uu dadku ku jeesjeeso oo uu soo booqdo, nafteydiina waxaa ku adkaaday inaan gefkaygii aqoonsado.

Fudeydkaasi wuxuu ii soo jiiday wax badan oo aanan ka soo waaqsan karin, madax-adeygii wuxuu i hor keenay ama ii hor kacay inaan halis bartanka ugu dhaco oo aan badaha ku dul joogo, dhibaatooyin aan maskaxdu rumeysan karinna waa ila soo gudboonaadeen.

Dabadeed, markaan «London» tegey ayaan ku tashaday inaan faraqa ku xirto koox badmareenno ah oo xeebaha Afrika saantoodu u sii jeeddo. Mana ogeyn waxa ay waayuhu ii qarinayeen oo dhibaato iyo balanbal ah.

# *Fasalka Labaad*

## QAFAALASHO IYO SIIDEYN

### 1. SOCDAAL GUUL LEH

Waa gar haddey nolosheyda soo socotaa ahaato mid ka kooban dhibaato iyo hoog aan kala go' lahayn, dhibaatadii aan ka baxaaba mid kale ayey ii dhiibtaa, markaan ciriiri ka fakadana waxaan ku dhacaa mid kii hore ka daran. Gar bey igu ahayd, maxaa yeelay waalidkey iyo dadkeygii ayaan ka careysiiyey oo waanadoodii dhegaha ka fureystay, iyaga oo aan ii oggolaanna waanigii gurigii ka soo baxsaday. Markaasaan garaystay guuldarrooyinka igu dhacayey inay ahaayeen abaalmarin aan mudnaa oo iga soo gaarey madax-adkaanteydii iyo caasinnimadeydii.

Waxaan goostay inaan socdaalkaygii sii wato, markii ay igu adkaatay inaan gurigaygii ku laabto anigoo faro maran oo khasaaro la kulmay. Gefkii aan galay ayaan damacsanaa inaan ku hagaajiyo mid labaad oo kii hore ka fool xun. Badmareenkii u horreeyey ee aan arkay ayaan dacalka iska laadlaadshey, kuna goostay inaan la

socdaalo. Xeebaha «Gaana» ayey doontiisu u shixnadnayd, wuxuuna iiga sheekeeyey socdaalkii uu dalkaas ku tegey ee ugu horreeyey guulihii uu halkaa kala kulmay iyo hantidii badneyd ee uu ka soo hooyey. Mar alla markaan sheekadeyda la socodsiiyey ayuu i dhiirrigeliyey oo inaan raaco igu boorriyey, kharashkii socdaalkana iga xil tiray. Wuxuu igu waaniyey lacagtii aan markaas haystey inaan alaabooyin ku iibsado, si aan uga ganacsado, aniguna waan ka yeelay wax alla wuxuu igu yiri. Socdaalkaasna guul baan kala kulannay, ninkiina wuxuu aad ugu dedaalay badmaaxnimada iyo ganacsiga sidaan u baran lahaa, waxaan «London» ku soo laabtay anigoo aad u qalbi wanaagsan, kuna faraxsan faa'iidooyinkii badnaa ee aan soo hoystey.

## 2. TUUGADII BADDA

Maalmo dhawr ah ka dib ayuu naakhuudahaasu geeriyoodey, aniguna si weyn oo aan qiyaas lahayn ayey geeridiisaasi naxdin ii gelisey, markaasaan laba boqol oo gini ugu deeqay afaduu ka tegey, boqolkii gini oo ii harayna alaab ayaan ku gatay, dabadeedna waxaan u dhoofay dalka «Gaana», ha yeeshee socdaal guuldarro ayaan markaana la kulmay. Tuugtii badda ayaa dhexda naga helay, markaas baan markabkayagii caynaanka u sii deynay, waxaannuna isku daynay inaan ka fakanno. Markabkayaga laba iyo toban madfac ayaa saarraa, tuugtuna siddeed iyo toban ayey heysteen. Waannu ka ciidan yareyn, hase ahaatee si geesinnimo leh ayaannu isaga caabbinay, laba jeerna waannu ka adkaannay. Markii saddexaad ayey nagu soo rogaal celiyeen markaasey naga adkaadeen. Qalcadahayagii ayey burburiyeen, saddex ninna waa naga dileen siddeedna waa naga dhaawaceen, dabadeedna waxay nagu qasabtay inaan gacmaha taagno oo aan isu dhiibno, markaana way na qafaasheen.

## 3. ADDOONSIGII

Naakhuudihii tuugta ayaa shaqadaydii u bogey, kolkaasuu addoon iga dhigtay. Labo sano oo gow ah ayaan u adeegayey, intaasna waxaan ku hammiyi jirey tabtii aan uga baxsan lahaa, hase ahaatee kuma guuleysan. Marar badan ayuu i kaxaysan jirey, si aan ula soo ugaarsado, hawlihiisii oo idilna wuu igu aamminay, aad buuna iigu kalsoonaa.

Maalin maalmaha ka mid ah ayuu naakhuudihii igu amray inaan u soo jillaabo kalluun uu martida u joogtay kula casheeyo. Taas waxan u qaatay fursad wanaagsan oo aan ku baxsan karo. Naakhuudihii wuxuu ii gacan geliyey doontii ugaarsiga, waxaana ila socday oo keliya wiil addoon ah iyo nin ay naakhuudaha qaraabo ahaayeen. Markaas baan ninkii ku iri:

«Waa inaad noo diyaarisaa cunto aan cunno, si aynaan sayidkeenna hadhow cuntadiisa ula qaybsan». Taladaas ninkii wuu igu raacay, wuxuuna noo keenay dambiil buuxda oo canjeero qallalan iyo buskud ah iyo saddex haamood oo biyo ah. Waxaan aadey makhaasiinkii naakhuudaha, kalana soo baxay faas, gudimo iyo xarko. Waxaan naakhuudihii weydiistay inuu noo keeno qoryo iyo rasaas aan ku soo ugaarsanno, markaasuu wixii aan dooneyney oo dhan gacanta noo soo geliyey. Sidaas baan ku diyaarsaday wax walba oo ii suurtagelin kara inaan baxsado.

## 4. BAXSADKII

Waxaan goostay inaan baxsado, mana hubin inaan ku guuleysanayo iyo in kale, hase ahaatee waxaan rumeysnaa niyadda adagi iney ka xoog badan tahay wax walba oo is-hortaaga, waase haddii quusta laga ilaaliyo.



In badan ayaannu soconnay, anigoo ninkii ila socdey mar kasta ka dhaadhicinaya inay iga dhab tahay oo aan soo qabanayo wixii uu naakhuuduhu ii soo dirsaday. Markii dambe ayaan inta ilbaadsaday badda ku tuuray. Dalaq ! !, wuxuuna ahaa nin dabaasha aad u yaqaan. Markuu ku sigtay inuu i soo gaaro ayaan qorigii ku jeedshey oo ku haddadey inaan nafta ka qaadi doono hadduu i soo daba galo. ka dibna wuxuu ka fursan waayey inuu xeebtii beegsado, kolkuu iga quustay.

Markaas baan wiilkii ku jiri, «Ma ii ballan qaadeysaa inaad daacad ii noqoneyso, mise sida, ninkaas baad

dib u laabaneysaa ? Ogowna, haddii aan wax yar oo dhagar ah kaa dareemo kaw baan kaaga siinayaa».

Intuu qoslay ayuu dhaar ku maray inuu daacad ii ahaan doono, meeshii aan rabana uu ii raaci doono. Shan cisho ayaannu socod ku jirnay, hawaduna way hagaagsaneyd, badduna wey degganayd, waxaanna hubsaday in aan naakhuudihii i soo gaari karin. Makhribkii markay noqotay ayaan xeebtii u soo dhowaaday oo ku tashaday inaan habeenkaas halkaas ku hoydo.

## 5. DUGAAG QOOQAN

Waxaa igu soo dhacday inaan habeennimadii xeebta u baxo si aan u ogaado halka aan dunida ka joogno; ha yeeshee waxaan maqallay codad naxdin leh, waxaannuna dareennay inuu dugaag qooqani agtayada ka am leeyahay. Markaasuu wiilkii garka iyo gondaha igu dhegey oo iga baryey inaanan markabka ka tegin si aannaan halis u gelin.

Habeenkii oo dhan ayaannu xeebta agteeda yaxoobney, annagoo aan marna il iyo baal isa saarin, mar walbana waxaannu diyaar u ahayn inaannu dugaagga iska dhicinno, haddii uu dhankayaga u soo alamsado.

Markaasaan arkay raxan bahalladii ka mid ah oo xagga markabkayaga u soo socda, kolkaas baan middood xabbad ku riday, dabadeedna iyagoo giddi wada cabaadaya oo qayladii rasaasta oo markaas ugu hor lahayd ka argagaxsan ayay dib u carareen.

Biyaannu aad ugu baahnayn, markaasuu wiilkii ku taliyey inaan anigu doonta ku haro, isna uu tago oo uu haanta noo soo buuxsho. Markaasaan weydiiyey, «Maxaad tegista ugu dheggan tahay?».

Markaasuu igu yiri, «Waxaan rabaa iney halistu keligey igu koobnaato. Waxaan rabaa haddii aniga jidka la igu dilo inaad adigu naftaada la baxsatid oo aad nabad gashid».

Daacadnimadiisii intaan ka yaabay ayaan ku diidey inuu keligii tago. Meel xeebta u dhow ayaannu barroosinkii dhigannay, markaasuu wiilkii in yar iga fogaadey oo haddana soo laabtay isagoo bakeyle soo ugaarsaday, meel biyo lehna soo arkay. Halkaas baannu, annagoo faraxsan bakeylihii kaga dheregnay, wax yar ka dibna ka shiraacannay.

## 6. UGAARASHADII LIBAAXA

Si lama filaan ah ayuu wiilkii ii soo eegay, isagoo igu boorrinaya, «Xeebta ka fogow ! Xeebta ka fogow», wuxuu ahaa wiil aad u indho curdoon. Markaasaan meel aad u durugsan ka arkay libaax aad u qiro weyn oo jiifa.


Waxaan arkay wiilkii oo si weyn cabsiyi u gashay, markaasaan ka codsaday inuu is dejiyo si aan libaaxu noo arag. Saddex qori oo aan watay ayaan rasaas ka buuxsaday, markaas baan libaaxii oo jiifa xabbad faraha kaga qaaday. Libaaxa oo labadiisa jeeni midkood gafuurka saartay ayay xabbaddii lugta uga dhacday markaasay lafaha jebisay.

Saddex qoob ayuu ku istaagay, isagoo gurxamaya oo dhiillaysan. Xabbad labaad ayaan kaga qashar tuuray, markaasuu dhulka isbilqay, isagoo dhiiggiisii ku dhex dabaalanaya. Wiilkii ayaa ku orday oo haddana xabbad saddexaad dhegta kaga tuujiyey, markaasuu si wacan u habsaday.

Runtii waan ka qoomamooday wixii aan sameeyey,

maxaa yeelay, annaga oo aan hilibkiisa cunayn, ayaannu dilkii libaaxa raraas ku khasaarinnay.

Dabadeed, wiilkii ayaa libaaxii ku orday oo isku dayey inuu madaxa faas kaga jaro ha yeeshee wuu kari waayey. Markaasna intuu labadiisii jeeni mid soo gooyey ayuu ii soo qaaday. Maalin dhan ayaannu haraggii ka siibaynay, laba maalmoodna qorraxda ayaannu ku qallajinaynay. Dabadeed muddo toban maalmood ah oo kale ayaannu soconnay, iyadoo uu saadkii naga sii idlaanayo. Toban maalmood oo kale ayaannu soconnay, annagoo Ilaah ka baryeyna inuu nala kulmiyo doon ka mid ah kuwa «Yurub» ka yimaada oo «Gaana» ku socota ama «Gaana» ka timid oo «Yurub» ku socota. Rajadaas bay ahayd wa-



xa aannu socodkayagaas ugu dulqaadannay, haddii ay suuragal noqon weydana waxaan geeri ahayni nooma soo socon.

## 7. XEEBTA AGTEEDA

Koox rag ah oo qaaqaawan ayaannu ku aragnay meel xeebta agteeda ah. Waxaan damacnay inaan u tagno ,hase ahaatee wiilkii baa iiga dhaartay. Mid qura oo ul yar heysta mooyaane, wax hub sita ma ay lahayn. Markaasaan faraha ugu tilmaamay inaan gaajeysannahay, dabadeedna waxay sidoo kale iiga codsadeen inaan u soo dhowaado oo meel aan ka fogeyn doonta soo dhigto. Labo ka mid ah ayaa intay degdeg u tageen iila soo orday labo cad oo hilib ah iyo muufo.

Annaguna waan ka cabsaneyney, iyaguna way naga cabsanayeen, sidaas aawadeedna labadii nin kolkay cuntadii noo keeneen ayay dib u carareen, si ay shartayada uga nabad galaan. Markay cuntadii noo dhiibeen oo aan doontayadii ku noqonnay ayay walaalahood u tageen. Waannu ku mahadinnay oo keliya, maxaa yeelay wax aan siinno ma aan haysan.

Annagoo sidaasa ayay soo baxeen laba bahal oo waaweyn oo isa soo daba ordaysa, buurahana inta ka soo baxay xagga badda u soo farandullaynaya. Kii usha sitey mooyaane nimankii intii kale way carareen. Markaasay labadii bahal intay badda ku dhaceen dabaal iyo ciyaar naga ag bilaabeen. Mid baa xagga markabkayaga u soo dhaqaaqay, noona soo dhowaaday, markaasaan xabbad madaxa kaga dhuftay, markiibana intay seedaha goysey ayuu marna gunta ku libdhaa, marna dul sabbeeyaa, isagoo dhanka xeebta tiigsanaya. Ha yeeshee intuusan gaarin ayey naftii ka baxday, kii kalana xagga buuraha ayuu u baxsaday. Nimankiina intay noo bogeen ayey qaylo ku

dhufteen. Way noo bogeen, hase yeeshee aad bay u argagaxeen, qaarkoodna dhulkayba isbilqeen cabsi awgeed. Markaasaan ugu baaqay iney isdejiyaan, ilaa ay cabsidii ka ba'day oo ay sidoodii hore ku noqdeen.

Dabadeed, waxay bilaabeen inay bahalkii haragga ka siibaan waxayna ii soo taageen cad hilibkiisii ah, ha yeeshee waan diidey, anigoo ku mahadinaya, waxaanna ku kaaftoomay haraggii oo keliya iyo in yar oo cunto ah.

Haddiyaddoodii aniga oo ku mahad naqaya ayaan ka guddoomay, dabadeedna waxaan ugu baaqay inaan biyo u baahannahay, waxaanna u dhiibay haantii oo maran. Durbadiiba intay garteen waxa aan rabo ayey ii soo buuxiyeen, ka dibna intaan salaamay ayaan u shiraacday xagga iyo koofur, waxaanna soconayey muddo kow iyo toban maalmood ah.

## 8. YIDIDIILADII QUUSTA II BEDDESHAY

Markabkaygu jaah wareer ayuu badda ku dhex muquurayey, waxaanna ku sigtay inaan rajo dhigo. Meel aan u socdey ma garaneyn, waddo aan ku joogana lama aan socon. Walaacaygii ayaa batay, waxaanna qoomameeyey wixii aan hore u geystey iyo caasinnimadii aan waalidkay kula dhaqmay. Waxaan xusuustay fudeydkii iyo nacasnimadii dhibtii ay i geyeysiiyeen, markaasaan Ilaah dembi-dhaaf weydiistey, kana codsaday inuu iga cafiyo wixii aan hormarsaday, jidka nabadgelyadana ii fududeeyo.

Anigoo sidaas isugu maqan ayuu ii yimid wiilkii oo qeylinaya, cabsina uu hadalkii kala soo bixi la' yahay: Eeg ! Eeg ! markabkaas weyn eeg ! Waxaan ka cabsi qabaa iney doontii naakhuudaha tahay !

Aniguse si fiican baan u hubay inuusan naakhuuduhu na soo heli doonin, mar alla markaan eegayna waxaan gartay inay Burtaqiis tahay, inkastoo ay naga fogeyd.

Tabartayadii oo dhan waxaan isugu geyney sidii aan markabkaas ku gaari lahayn, ha yeeshee kuma aan guuleysan, waanna ka quustay inaan u tago. Anigoo quustaas jooga ayaa mid ka mid ahi xoqaddiisii igu arkay, anoo markaas qorigaygii xabbad ka riday, si aan u dareensiiyo halista aan ku jiro.

Saddex saac ka dib ayaan doontii gaarey, anigoo daal badan qaba iyana kolkay sheekadayada ogaadeen ayey si wacan ii soo dhoweeyeen, markaasaan naakhuudihii doonta u hibeeyey dhammaan wixii doontayada saarraa, ha yeeshee wuu diidey inuu abaalgud ka qaato axsaankii uu ii galay. Si weyn oo xad-dhaaf ah ayaan u farxay, ka dib markaan hubsaday inaan halistii ka habad galay.

## 9. SOCDAALKII BARAAZIIL

Doontii aan helay waxay ku socotay dhulka «Baraaziil» naakhudihiina wuxuu badmareennadii ka xaaraameeyey alaabtii aan watay iney faraha saaraan. Markabkaygii wuxuu iga siiyey siddeetan gini, wiilkiina wuxuu iiga meersaday lixdan gini. Iibsadka wiilku ma ahayn wax aan anigu doonayey, raallina kama ahayn in aan addoonnimo kaga gato, laakiin naakhuudahaa iga ballan qaaday inuu toban sano ka dib sii deyn doono. Sidaas ayaan ku oggolaaday aniga oo aan waxba ka qaban karin. Socdaal wacan oo raaxo leh ayuu kaasi ahaa, dalka «Baraaziil»-na laba iyo labaatan maalmood ka dib ayaannu tagnay.

## 10. DALKA «BARAAZIIL» ANIGOO KU NOOL

Naakhuudihii doontu wuxuu i baray nin ka mid ah odayaasha dalka «Baraaziil» oo laba beerood oo qasabka lagu abuuro iyo warshad sonkorta lagu sameeyo ku leh, si wanaagsan buu iigala ballamay, markaasaan naakhuudihii uga mahadiyey abaalkii uu ii galay iyo siduu ii qabtay intii aan la socday.

Odaygaas wanaagsan oo beeraleyda ah aad baan la joogistiisa ugu liibaanay, maxaa yeelay wuxuu i baray sidaan qasabka u beeri lahaa, dabadeedna aan sonkor uga sameyn lahaa. Afar sano markaan la joogeyna hawlahaygii oo dhan ayaa ii hagaagay, waxaanna dhex galay nolol aad u barwaaqeysan.

Ha yeeshee, markaan dalkaygii xusuustaba waan xusuusan jirey waana u boholyoobi jirey, anigoo ka xun tegiddii aan ka soo tegey.

Muddadii aan halkaa joogey waxaan bartay rag badan oo ka tirsan beeraqodatada halkaas, maalmaha qaarkoodna habeenkii ayaannu sheekaysan jirney, anigoo u sheegi jirey wixii aan socdaalkaygii dalka «Gaana» kala kulmay iyo sidii aan xoolaha badan uga kasbaday ganacsigii alaabooyinka aan qiimaha lahayn ee maqasyada, mindiyaha iyo muraayaduhu ay ka mid ahaayeen. Markaas bay jeclaadeen inay dhulkaas u socdaalaan, dabadeedna waxay diyaarsadeen doon weyn, waxayna iga codsadeen inaan socdaalkaas u raaco. Durbaba jacaylkii badda ayaa igu soo laabtay, saaxibbaday qaar ka mid ahna waxaan uga tegay ilaalinta beerteyda iyo daryeelka warshaddeyda inta aan maqanahay.

Dabadeed bishii Sibtembar sannadkii 1659kii ayaannu badda ku dhoofnay waana maalin taariikh ah maalintii aan dalkayga ka imid oo siddeed sano muddo ah laga joogo uu xilliga guuldarradu ii bilaabmey.

# *Fasalka Saddexaad*

# JASIIRAD FOG

## 1. SOO-DHICIDDI DUUFAANTA

Doontii aannu socdaalkaas u diyaarsannay waxay ahayd doon weyn oo boqol iyo labaatan tan qaadi karta. Lix madfac ayaannu ku rakibnay, afar iyo labaatan bad-mareenna waannu u doorannay.

Waxaannu ku rarnay alaabtii aan soo gadannay ee aan ganacsiga dalalka reer «Afrika» ugu tala galnay, maqasyo, faasas, dubeyaal, muraayado, guluusyada dharka iyo waxyaalo la mid ah.

Annaga iyo doontayadii waxaan abbaarnay xeebta «Afrika», maalintii saddex iyo tobnaadna waxaannu la kulannay duufaan aan naxariis lahayn oo laba iyo toban maalmood ka fool ka fool noo luggoynyesay. In yar markay degtaba way soo xoogowdaa, soo korodhaa oo soo cartantaa, ilbiriqsigii walbana waxay nagu guulguuleysey hafasho iyo geeri fool xun.



Muddadaas ay duufaantu socotey ayaannu jidkii badda ka habownay, mar walbana waxaan sugeynay saacadda aan xagga aakhiro u iilan doonno.

## 2. HUURIGII BADBAADADA

Arooryo hore mar ay tahay ayuu berrigii meel fog nooga muuqday markaasay rajo yari na gashay. Ha yee-

shee, ma fogeyn markay rajadaas yari naga ambatay ee ay quustu noo beddashey, maxaa yeelay duufaantii ayaa doontayadii ku dharbaaxday buur ciid ah. Nabarkaas oo ahaa mid xoog weyn dartiis ayey doontayadii la dhaqaaqi weydey, dabadeedna mawjadihii caraysnaa ayaa kor kaga yimid oo wada xabaalay. Dhimasho xun ayaa u muuqatay inay lagama maarmaan noo tahay, waxaannuna laabta gashannay inay aakhiradayadii isha baarkeeda noo saaran tahay.

Wax kastoo na soo gaaray, haddana ma aannaan quusan, mana aanan samrin. Waxaannu si degdeg ah ula soo baxnay huurigii badbaadada, baddana waannu u soo dejiney, waxaannuna ku dhaqaaqnay, annagoon wax la harin, si kasta oo aan ku fakan karro, xooggayagii ayaannu isugu geyney sidii aannu huuriga badda u dhex jiirsiin lahayn ilaa aannu xeebta u soo jirsannay hal meyl iyo bar. Kolkaasey mawjad qooqani nagu soo dhacday oo cirkii naga qarisay, waxaannuna u maleynay iney buur biyo ah dusha nooga soo dhacday, markaasuu huurigii afkii hoos marsaday ! ! Shug !

Hareerahayaga ayaan eegay, anigoo is leh bal dadkii eeg, mise saaxiibbaday qofna kama muuqdo. Markaas kaddibna il iyo baal kama aan qaadin, meel ay ku dambeeyaanna war uma hayo.

## 3. KA BADBAADIDDII HAFASHADA

Anigase mawjadihii baa igu cayaaray oo midiba mid ii dhiibtay, cabbaar ka dibna waxay igu dharbaaxeen qar dhagax ah oo fiiqfiiqan. Xooggii aan dhagaxa ugu dhacay dartiis ayaan la miyir beelay, wax yar ka dibna waan miyirsaday. Nasiib wanaag, intaanay baddu caradeedii soo ceshan ayaan anigu miyirkaygii soo ceshaday.

Markaan arkay mawjaddii oo igu soo socota, rabtana inay i liqdo ayaan xoggaygii oo idil dhagixii isugu geeyey oo isku maray, si ay biyuhu dushayda uga noqdaan.

Baddii ayaa dabadeed tartiib tartiib u caga dhigtay, markaasaan taagtayda iyo dadaalkayga oo dhan kaashaday, ilaa aan xeebtii gaarey, anigoo rumeysan inaan hafashadii ka nabad galay.

## 4. BEDBAADADH KA DIB

Markaan arkay inaan geeridii xumeyd ka baxsaday ayaa farax weyni i galay, baddii baan isha la raacay, anigoo is leh bal wax saaxibbadaa ka haray ka jeedaali.



Waxaan arkay saddex koofiyadood, duub iyo kabo biyaha korkooda sabbaynaya, markaasaan hubsaday inay saaxibbaday wada geeriyoodeen oo aan midina ka baxsan.

Raggaas dhimashadoodii aad baan uga xumaaday, naftaydana waan u xanuunsaday, maxaa yeelay si laga naxo ayaan ku sugnaa. Dharkayga oo dhammi wuu qoyanaa, wax aan isaga beddalana ma aan haysan.

Gaajaa alla igu kartamiyey, wax aan nafta ku ceshadana la iguma ogeyn, taagdarro iyo tabarxumo xanuun leh ayaan xubnihii la dhaqaajin waayey, iimana suuragelin inaan xooggeygii soo ceshado, maxaa yeelay daal badan iyo halgan ba'an ayaan soo maray.

## 5. LAAMO GEED DHEXDOOD

Waxaan ka cabsaday inuu habeenku meel bannaan iigu soo galo oo ay markaas dugaaggu hilibkayga si fudud u hadiidaan. Ma haysan wax hub ah oo aan xoolo aan quuto ku ugaarsado ama aan dugaagga naftayda u soo hanqal taagaya isaga celiyo. Mindi yar oo aan wax tarayn oo keliya ayaa kolkaas gacantayda ku jirtay. Waxaan is-arkay anigoo gabiib maran taagan oo uu aayahayga dambe uu noqdo mid aad u madow. Afarta jaho ayaan kolba mid u ordaa, anigoo argagaxsan oo ay cabsidii wax walba i illowsiisay.

Habeen bay noqotay, kolkaasay cabsidii igu korodhay, waxaan ka fursan waayey halkii aan caawa seexan lahaa inaan ka fekaro, dabadeedna waxaan doortay geed weyn oo agteyda ku yiil. Laakooyinkii iyo laamihiisii foodda iskula jirey ayaan dhex fariistay, markiiba waan gam'ay, maxaa yeelay waxaan gaaray heerkii daalka iyo canaabta ugu sarreeyey. Habeenkii oo idil waan hurday, mana baraarugin tan iyo barqadii dambe. Waxaan arkay



qorraxdii oo si wacan u ifeysa, hawadii oo muraayad la moodo iyo baddii oo deggan, quruxna ku gaafan. Baddii baan isha la raacay, gees walbana waan ka eegay, amankaag baase igu dhacay kolkaan arkay doontii oo fadhida meel jasiiradda hal meyl u jirta. Show hirarkii baa buurtii ciidda ahayd ka soo saaray oo ku soo tuuray meel u dhow qarkii ay mawjaduhu shalay igu soo hardiyeen. Talo wacan ayaa halkaas iiga muuqatay, taas oo ahayd inaan doonta si degdeg ah ugu tago oo aan ka soo qaato waxyaalaha ugu waaweyn ee aan u baahanahay intaan joogo jasiiraddan waaqlaha ah. Waxaan goostay inaan ordo intaan mawjaduhu doonta burburin oo aysan baddu hoosta gashan, taasna waxaa igu dhiirriyey degganaanshaha badda iyo hoosaynta hirarka.




Duhur bay ahayd, kulaylkuna aad buu u darraa, markaasaan dharkii iska bixiyey oo doontii u dabaashay ilaa aan gaaray. Hareeraha ayaan hadba dhan ka maraa, anigoo garan la' si alla si aan u fuulo.

Anigoo quus ku dhow ayaa xarig soo laalaadaa ii muuqday, markaasaan dhab iri oo doontii dhakada uga baxay, in kastoo aan daal badan ka mutay, waxaan arkay biyihii oo dhulkii doonta u soo gudbay, hase ahaatee aan dheegga gaarin, welina aan baabi'in saadkii iyo

alaabtii ku rarrayd. Wixii aan markaas goobayey ee iigu darraa waxay ahaayeen cunto iyo biyo, dabadeedna cuntadii baan afka dhigay ilaa aan dhergey, biyihiina waan cabbay ilaa aan wabxay.

## 6. MARKABKII YARAA

Waqtigaygii ciyaar kuma lumin. Waxaan isu soo ururiyey looxaantii kala daadsanayd, tiirarkii jajabay iyo shiraacyadii jeex-jeexnaa. Markab yar ayaan intaas ka sameeyey. Saddex sanduuq intaan jebiyey ayaan wixii ku jiray ka mariyey oo intaan xargihii ku soo dejiyey markabkii yaraa gudaha u soo dhigay. Sanduuqyadii ayaan rooti, bariis, farmaajo iyo hilib kumbis ah ka buuxsaday. Makhaasiinkii doonta ayaan eegay, mise waxaa ku jira in yar oo saarreen iyo qamadi ah, kuwaasoo aan u soo qaadannay inaan shimbiraha iyo digaagayaga ku quudinno, markaasaan sanduuqyadii midkood ku soo shubay.

Aniga oo hawshaydii ku dhex jira ayaan xagga xeebta eegay, mise dharkaygii oo hirku soo jiiday ayaa biyaha dul sabbaynaya markaasaa wadnuhu i belbelay oo aan aad u naxay.


Ha yeeshee doontii dhexdeeda ayaan ka helay dhar aan midkaygii ka yarayn, markaas baan soo urursaday wixii aan qaadi karayey. Qalab iyo alaab wixii aan u baahnaana waan la soo degay. Waxaan kaloo helay sanduuq nijaaradeed oo markaas iiga qaalisanaa wax alla wixii mulkad ah oo ifka yaalla, waxaanna anigoo faraxsan ku soo dhex tuuray markabkii yaraa.

Intaan wax googoobayey waxyaalihii aan helay waxaa ka mid ahaa laba bastooladood, laba qori iyo laba seefood oo gaboobey, maarina ay dabooshay, kiishad rasaas ah iyo dhowr kiishadood oo baaruud ah.

Waxaa doonta ku rarnaa saddex fuusto oo baaruud ah, markaas baan goobid ugu dhaqaaqay ilaa aan faraha ku dhigay. Mid baa wixii ku jiray biyihii halleeyeen, ha

yeeshee labadii biyaha ka fakaday ayaan markabkii ku dhex riday intaan soo dilindilleeyey. Waxa keliya oo hadda ii harsanaa waxay ahaayeen inaan markabkayga xeebta la soo aado. Ugu dambeyntiina kolkaan in badan baadi goob ku jirey waxaan helay saddex badiil oo jajaban, laba miinshaaradood iyo dubbe, intaasna markabkii baan saaray.

Cabbaar ka dib ayuu hirkii xeebta ii jiiday, wuxuuna i geeyey meel aan wax badan ka durugsanayn meeshii aan shalay degey.



# *Fasalka Afraad*

# DHULKEYGII CUSBAA

## 1. BUUR DHAKADEED

Wixii iigu horreeyey ee aan ku dhaqaaqay wuxuu ahaa sahaminta iyo barashada dhulkan iga dahsoon ee ay waayuhu igu soo tuureen. Waxaan is lahaa bal inaad heshid meel aad ku hoyato.

Markaas ma ay jirin waxaan dhulkaan ka aqiin. Ma jasiirad bay mawjaduhu igu soo tuureen, mise qaarad? Ma dhul la deggan yahay baa, mise waa waaqle? Ma dhul lagu nabad geli karaa, mise waa dhul cabsi leh? Ma dad ilbax ah baa ku dhaqan, ma galti baa ku dhaqan, mise dugaag heeraa ah baa farandulleynaya? Waxyaalahaas oo dhan wax aan ka ogaa ma jirin.

Afartii jaho ayaan indhaha la raacay, markaas baan arkay buur weyn oo qiyaasta hal meyl ii jirta. Qori iyo bastoolad intaan cabbaystay ayaan waddada cagta saaray. Markaan tegey ayaan arkay inaan la fuuli karin, fiinteedana waxaan gaaray mar aan si fiican u daalay.

Aad baan u naxay, una xanuunsaday markaan ogaaday meesha aan shalay degey iney jasiirad tahay. Meeshii aan eegaba waxaan arkaa baddii oo afarta gees jasiirad-da kaga wareegsan iyo laba jasiiradood oo yaryar oo qi-yaasta saddex meyl xagga galbeed iiga muuqday.

Waxaan ogaaday iney tahay jasiirad fog oo waaqla ah oo cidina aysan degganayn, haddii laga reebo dugaag aanan anigu weli arag. Ma dad baa? Laguma ogeyn, loona malayn maayo iney dad ku dhaqan yihiin jasiirad-dan abaarta ah ee ay astaamaha noloshu ka maran yihiin.

## 2. XABBADDII KOOWAAD

Anigoo halkii aan ka imid ku soo socda ayaan ar-kay koox shimbiro ah oo aanan markaas ka hor arag, markaasaan qorigaygii ku liishaamay mid ka mid ah oo keyn ii dhoweyd dul saarrayd.

Waxay ahayd sidaan filayo, markii ugu horreysey ee ay xabbadi jasiiraddan ka dhex yeerto. Cabsi awgeed ayey shimbirihii la yaaceen markii ay maqleen xabbaddii argaagaxa lahayd ee aan ku ridey. Kolba dhan bay u duu-layeen, weyna qeylinayeen wiiq! wiiq! wiiq!. Shimbirkii aan dilay wuxuu ahaa mid galleyrka u eg oo hilib yar, diihaal gaajana aan wax ka tari karin.

## 3. KU LAABASHADII DOONTA

Waagu markuu ii beryey ayaan dharkii iska bixi-yey. Waxaan reebtay shaati jeexjeexan, sarwaal iyo kabo fudud, markaan tegey ayaan ka soo daldashay alaaboo-yin badan oo waxtar ah, aadna aan ugu baahnaa.

## 4. BUULCAWS SANAADIIQ AH

Intaan gadaal u noqday ayaan kala dhigdhigay alaabtii aan doonta ka keenay. Maalintii oo dhan ayaan

kala dhigayey oo si fiican isugu hagaajinayey. Habeenkii markuu ii soo galay ayaan garan waayey sidii aan nabad gelyo ugu seexan lahaa oo aan dugaagga uga badbaadi lahaa. Wax badan haddaan fekerayey ayey talo wanaagsani igu dhalatay. Sanaadiiqdii aan doonta ka keenay intaan isu soo dhoweeyey ayaan ka sameystay buulcaws aan cawadaas u hoydo. Waxaan xusuustay inaan u baahanahay xargihii iyo darbaalladii doonta, kolkaasaan ku goostay inaan berri raadsado marka uu hirku dego inta aysan duufaanta baddu moolka hoos ula degin.

## 5. KU LAABASHADII DOONTA

Waxaan ku guuleystay inaan helo laba qufadood oo ay masaamiiri ka buuxdo iyo qalabka nijaaradda oo ay ku jiraan laba iyo toban gudimood iyo waxyaalo kale. Dharkii, shiraacyadii doonta, dabooliadii iyo wax alla wixii aan helay ayaan soo urursaday oo buulcawskaygii yaraa kula soo laabtay. Guushaas aan gaarey ayaa i dhiirri gelisey oo xoog iyo hawlkarnimo weyn igu kordhisay. Waxaan ka cabsi qabay intii aan soo maqnaa inay bahalladu cuntadii aan ka soo tegay iga marsadaan. ha yeeshee kolkii aan soo noqday ayey cabsidii iga ba'day, maxaa yeelay markaan soo laabtay bahal raadkiisba waa ii muuqan waayey. Waxaan arkay bahal aan bisadda laga aqoon oo sanaadiiqdii mid ka mid ah ku dul fadhiya, mar alla markuu i arkayna wuu cararay.

Dhawr tillaabo meel ii jirta intuu istaagay ayuu aad ii soo dhawray isagoo aan wax cabsi ahi ka muuqan. Qorigeygii ayaan ku liishaamay, ha ahaatee muu dhaqaaqin, inuu cararana iskuma uu dayin. Markaas baan u tuuray cad buskud ah. Wuu u soo dhowaaday oo ursaday oo dhadhamiyey, markiibana liqay. Astaamaha raynraynta ayaa wejigiisa ka muuqday, markaasaan gartay inuu cad kale rabo, mase siinnin, maxaa yeelay sahay-

daydu wey yareyd, mana habbooneyn inaan isaga ciyaaro. Sidaas bay bisaddii ku quusatay, wayna isaga kay tagtay markaan wax u diiday.

## 6. DIYAARINTII AQALKA

Waxaan ka fekeray sidii aan u diyaarsan lahaa aqal aan dugaagga kaga dhuunto oo aan alaabta ku dayac tirto, iigana dhawrā daadadka roobka iyo kulaylka cadceedda. Waxaan dhistay buulcaws aan shiraacii doonta ka sameeyey oo aan udubbo ku taagay, dhammaan wixii aan doonta ka keenay ayaan ku soo xareystay markaas baan sanaadiiqdii iyo fuustooyinkii heeraar uga dhigay, looxaan aan habeeyey ayaan albaabkii hoosta kaga xiray, gadaalna waxaan kaga soo tiiriyey sanduuq maran. Intaas markaan dhammeeyey ayaan labadii bastooladood barkinta hoos gashaday, ilaa waaberigiina si deggan oo macaan ayaan u jiifey ama u hurday.

## 7. ALAABTII DOONTA

Waxaan iskula hadlay allaylehe wax kugu filan iyo wax kaa badanba waad heshay, hase ahaatee doontii oo weli ii muuqatay ayaa damac i gelisay. Wax alla waxa ku raran in aan soo gurto, ayaa igu dhalatay mar haddaan aadi karaba, markii ay fikraddaasi i gashay oo aan iska saari waayey ayaan ku goostay inaan maalin walba aado oo wax ka soo daldasho. Lix maalmood oo isku xigta ayaan markaas ka dib isaga daba noqday, waxaanan is iri allaylehe alaab iyo cunto wixii saarraa oo idil waad ka soo dhammeysatay. Ha yeeshee maalintii toddobaad ayaan yaabay, markaan arkay fuusto weyn oo buskud afka ka hayo. Intaan ka soo saaray oo darbaallo ku kala shubay ama ku guntey ayaan buulcawskeygii ula soo noqday, anigoo raalli ah oo faraxsan.

## 8. BOOQASHADII UGU DAMBEYSAY

Maalintaas maalintii xigtay ayaan siday caadadaydu ahayd doontii aaday, waxaan dareemay dabaylo soo hugmaya. Uma dan gelin. isumana jiclin. maalintaasna waxaan soo helay saddex makiinadood oo qolka naakhuudaha aan ka helay. Waxaan kaloo helay laba maqas, qaaddooyin dhawr ah iyo alaabooyin kale oo waxtar leh. Meel baan dhugtay, mise waxaa yaal lix iyo soddon gini oo dahab iyo lacag ah. Jeesjees dartiis baan la muusooday illeyn jasiiraddaan fog lacag uguma baahniye. Waxaa igu soo dhacday inaan badda ku tuuro, misna waan ka noqday, waxaana ku dhex riday boorso caw laga sameeyey. Waxaan arkay cirkii oo ay daruuri soo buuxisay, markaas baan buulkaygii u cararay. Daal badan ayaan kala kulmay sidii aan mawjadaha uga adkaan lahaa, hase yeeshee, Ilaah mahaddii, anigoo nabad qaba ayaan xeebtii tegay.

## 9. SHIIDIDDII DOONTA

Isla markii aan buulkaygii imidba waxaan arkay dabaylihii oo xoog u dhacaya iyo mawjadihii oo hugun iyo hardan iskala soo horjeeda. Habeenkii oo dhan ayaa baddu caynkaas ahayd oo ayan mar qura cago dhigin. Waagu markuu beryey oo aan baddii isha la raacay ayaan doontii raqdeed iyo ruuxeedba ka arki waayey, markaas baan ogaaday inay duufaantii dejisey. Kama aan nixin, maxaa yeelay awel hore ayaan tabar iyo taag wixii aan lahaa isugu geeyey sidii aan waxa saaran uga soo rogan lahaa, waana ku guuleystay.

## 10. AQALKII CUSBAA

Markaas ka dib waxa keliya oo ii harsanaa waxay ahayd sidii aan u soo saari lahaa hab iga celiya gardar-

rada aadanaha iyo wareenka dugaagga. Waxaan ka fekeri jirey dhismaha aqalka aan taagi doono, mana garanayn: ma god baan qotaa, mise buulcaws baan degaa? Waxay talo iigu idlaatay inaan labada isku daro. Meeshii aan markii hore degey inay ahayd meel muddo badan in la degganaado aan ku habboonayn, ayaan gartay, maxaa yeelay waxay ahayd meel hoose oo carroseel ah, caafimaadkana u daran. Intaas ka sokowna, waxay ahayd meel biyaha macaan ka fog.



Meel kale oo tan ka hagaagsan ayaan goobgoobtay, halkii aan rabeyna waan helay. Meel bannaan oo buur dheer oo dhagxaan ahi u dhow yihiin, baddana u jeedda ayaan doortay. Buurta fiinteeda waxaa ka taagnaa dhagax weyn oo cirka ku tolan. Wuxuu iga celinayey kuleylka cadceedda iyo wax walba wixii gardarro iigu yimaada oo dad iyo dugaagba leh. Sidii godkii ayuu dhagaxaasi u qodnaa, markaasaan buulcaws ka hor dhistay, udubbadiina u adkeeyey. Markaas-baan is iri cadaw oo dhan waad ka nabad gashay. Aqalkaygii albaab aan ka galo uma aan yeelin, waxaanse u yeelay jaranjaro, taas oo aan gudaha gashan jirey. Habeenkii oo idil si wacan oo aan cabsi lahayn ayaan u seexan jirey. Markaas baan qalcaddaydan cusub u soo raray wax alla wixii alaab, cunno iyo qalab kale aan haystay. Saanqaaf laba shiraac ka kooban ayaan aqalkii dusha ka saaray. Intaan is korsaaray oo daamur ku dhayey ayaan si adag u xirxiray. Dabadeedna waxaan u jeestay sidii aan dhagaxa weyn uga qodan lahaa god aan makhaasiin ka dhigto, hawshaasna si dhab ah ayaan u guda galay.

Aniga oo sidaas ah ayaa hillaac meel walba ka walac yiri oo onkodkii dhegaha i jebiyey. Markaas bay cabsideydii badatay oo aan ka baqay inay baaruuddu meel walba burburiso.

Markaas baan hammigaygii oo dhan isugu geeyey sidii aan halistaas uga baxsan lahaa. Waxaan sameystay kolayo badan oo aan baaruuddii ku shubtay. Markaas baan kala dhigdhigay meelo kala durugsan, si hadduu midi u gubto ay kuwa kale dabka uga nabad galaan.

Habkaas ayaan kaga baxsaday inuu mar qura ololka dabku wada gaaro dhammaan baarudda ii taal, hawshaasina waxay igu qaadatay shan iyo toban beri oo isku xigta. Baaruddii ayaan dabadeed ku shubtay boqol qu-

fadood oo aan ku kala qariyey godadka dhagaxa, si aan qoyaanka uga ilaaliyo. Kaydkii baaruudda ee ii tiilley culayskiisu boqol iyo afartan rodol kama yarayn, aniguna aad baan u ilaashan jiray, laabtuna iima degin ilaa aan hubsaday inay meel aamin ah ku jirto oo aysan sahal iiga dhaqan beelayn.

# *Fasalka Shanaad*

# GARIIRKII DHULKA

## 1. ORGIDII JASIIRADDA

Maalin oo dhan hawl ma kala joojin jirin, haddii laga reebo waqtiyo yaryar oo aan dibadda u bixi jirey, si aan dhibta hawsha isku illowsiiyo ama aan u ugaarsi tago ama aan u sahansado meelo cusub oo jasiiradda ka mid ah, welina aanan tegin.

Maalintii u horreysayba waxaan arkay in orgiyi jasiiradda ka buuxdo. markaasna aad bay raynrayni ii gashay. Raynrayntaydii siima ay waarin, maxaa yeelay waxaan ogaaday inay dugaag tahay oo orod dheer tahay, markaan u soo dhowaadana ay big leedahay. Waxaan isku dayey inaan mid ka mid ah ugaarsado, ha yeeshee iima suuragelin, maxaa yeelay aad buu u fududaa, una caga badnaa, sidaas oo ay tahay haddana wax quus ihi ima gelin. Markay soo socoto ama ay sii galbanayso ayaan u dhakan jirey, mar walba oo ay i dareentana baf bay oran jirtey, gaar ahaan kolkaan anigu hoos joogo, iyaduna ay qararka saaran tahay. Waxaan ogaaday haddii aan anigu qararka saarrahay, iyaduna ay hoos daaqayso inaysan i dareemayn oo aysan is dhaqaajinayn.



Waxaan u hubsaday inay goor walba hoos u jeeddo oo aysan kor u qaadin madaxa. sidaas daraadeedna wixii ka sarreeya aysan arki karin. Waxaan gartay sida ugu habboon ee aan ku ugaarsan karaa inay tahay inaan dusha ka ilaashado oo aan ka soo toogto. Xeeshaasina waa ayii meel martay markaan toogtay ri' orgi wadata. Ridii aan dishay markaan garabka u ritay ayuu orgagii yaraa i soo daba galay ilaa aan gurigaygii imid, waxaanan isku dayey inaan maaweeliyo oo cayaariyo, si aan isu baro, hase ahaatee waan ku guuleysan waayey. Cuntadii aan u soo taagay markuu diideyna waxay igu qasabtay inaan gawraco oo aan cuno.

## 2. XUSUUSQOR

Markii ugu horreysay ayaan awood u helay inaan noloshayda hab la yaqaan u yeelo tan iyo markaan soo degay jasiiraddaan abaarta ah oo ku beegneyd soddonkii bishii Sibtembar. Xilligu diraac buu ahaa, hawaduna aad bay u kululayd, jasiiradda aan soo degayna waxay ku tiil digriiga sagaalaad ee waqooyiga dhulbaraha.

Toban casho ma aan joogin markaan ka cabsaday inaan taariikhda maalmaha iloobo, buug, waraaqo iyo khad midna ma haysan. Waan garan waayey si aan maalmaha taariikhda ugu sameeyo, wax badan markaan fekerayeyna dogob afar gees ah oo loox ah ayaan xeebta ka taagay, hadalka soo socdana waan ku xarriiqay.

«Jasiiraddan waxaan soo degey 30kii Sibtembar sannadkii 1658kii». Markaas ka dibna maalin walba xarriiq yar ayaan u sameyn jirey, toddobaadkana waxaan ku calaamayn jirey xarriiq isdhaafsan, sannadkana waxaan ku aqoonsan jirey, afar gees yar. Sidaas bay iigu suuragashay inaan ku ogaado maalmaha toddobaadka, bilaha iyo sannadka oo aan gef iyo illwosho uga nabad galay.

## 3. SAAXIIBBO DAACAD AH

Waxaa i dhaaftay inaan akhristaha u sheego inay laba bisadood iyo ey ay la socdeen doontii naga quustay, kuwaasoo loo qadderay inay sheekadoodu tayda ku xiranto. Markaan alaabada soo daldalayey ayaan labada bisadood la soo degay, eyguna intuu badda ku soo dhacay ayuu dabaal xeebta ku yimid, maalintii labaad buuna i soo gaaray.

Dhawr sano oo dambe ayuu eygaas wanaagsani ii shaqayn jirey. Wuxuu ahaa ey feejigan oo garasho dheer,

aadna wuxuu ugu ekaa khaadin dhug badan oo aragti dheer.

Wuxuu dhabtii ii ahaa adeege la yeesho iyo saaxiib la doorto midka ugu wanaagsan, aniguna waxaan u bogey feejignaantii uu la muuqday iyo aragtidiisii dheereyd ilaa aan iri :

«Hab kastaba dadkuu kala mid yahay hadalka mooyaane».

## 4. MAACUUNKII GURIGA

Akhristaha waxaan u sheegay inaan gurigayga cusub u soo wareejiyey dhammaan alaabtii iyo cuntadii aan haystay. Si aan hab samayn ayaan markii hore u dhigay, markaasuu gurigii ciriiri iga noqday ilaa aan waayey meel aan ku socsocdo, markaas baan ku dhaqaaqay inaan godkii ballaariyo, hawshaasina maalmo dhawr ah ayay igu qaadatay ilaa aan ka gun gaaray. Dabadeed, waxaa igu soo dhacay inaan samaysto maacuun inta aan aad ugu baahanay, waxaanan ka bilaabay kursi iyo miis. Shaqadaas isdabajoogga ahi waxay i siisay tababar xoog leh oo ii fududaysay inaan samaysto alaabooyinka lama huraanka ii ah intooda badan.

Waxaan ku guuleystey inaan maacuun badan sameysto anigoon gudin iyo xalleefato kale midna la kaashan. Haddaan damco inaan loox sameeyo geedka ayaan faaska ku goyn jirey oo jiridda dhulka dhigan jirey, labada dhinacna ka habayn jirey ilaa ay beddiisu ii suurogasho ayaan xalleefatada ku simi jirey.

Gudinta iyo xalleefatadu waxay ahaayeen waxyaalihii iigu waxtarka roonaa ee igu kaalmeeyey inaan sameysto alaab badan oo maacuunka guriga ka mid ah.

Runtii ma aan awoodi karin inaan geed dhan hal loox ka-badan ka sameysto, ha yeeshee samirkayga ayaa bad-naa. Lagama maarmaan waxaa ahaa inaan samir yeesho. Kursi iyo miis ayaan shaqadeydii ka bilaabay, ka dibna waxaan ku dhejiyey qodbo warwareegsan, si aan qorya-hayga iyo dharkayga u soo surto. Dadaalkayga oo dhan waxaan isugu geeyey sidii aan u sameysan lahaa alaaboo-yinka noloshayda lagama maarmaanka u ah.

## 5. XAYRTII ORGIGA

In kastoo ay waxyaalo badani iga maqnaayeen had-dana waxaa markaas iigu darraa sidaan shamac aan shi-to ku heli lahaa. Maqnaanshihiisu wuxuu igu qasbi jirey inaan habeenkii oo dhan gogosha dul aallo oo aanan dha-qaaq isku dayin.

Sidaan u fekerayey ayaan, ugu dambeystii dhibaa-tadaas ka adkaaday. Waxaan ku dadaalay inaan dhaqaa-leeyo orgida aan qasho xayrtooda, intaan qorraxda ku qallajiyo ayaan cad walba oo xayr ah waxaan dhex gelin jirey liifka dunta aan ka helo hargihii aan haystay. Sha-mac aan sidaas u samaysto ayaan habeenkii ka hor ku jiri jirey habeenno mudgi ah oon kala go' lahaan jirin.

## 6. SABUULKII GALLEYDA*

Maalin maalmaha ka mid ah anigoo hawshaydii ku dhex jira ayaan si kedis ah u arkay kiish galley ah oo aan ka soo qaatay doontaydii burburtay. Show jiir baa nag ka siiyey oo waa wada qolof, markaas baan kiishkii ka shubay oo god yar oo kayga u dhowaa ku sayray, si aan kiishka u bannaysto oo dano kale ugu qabsado. Markii ayaan ka dib roobabkii da'een oo dhulkii waraabiyeen, aniguna wixii oo dhan waan iska hilmaamay. Bil ku dho-waad markaan joogay ayaan la yaabay wixii aan arkay.



Waxa ii muuqday laamo qarka hoostiisa ka soo fufay. Markii hore waxaan u qaatay caleen aan la aqoon, waqti yar ka dibna waxaan ogaaday inaan gefsanaa, maxaa yeelay waxaan arkay laba iyo toban laamood oo ah sabuulka galleyda cagaaran.

Markaas baan aad u sii yaabay, si fiicanna waan u ilaashaday, si aan xilli-goosadka u goosto, xilligaas oo ku beegnaa bisha Juun. Si wanaagsan ayaan u goostay, xabbad qurana iskama aan lumin. Markaas ka dib xilligii tacabka ayaan abuurtay, waxaana ii muuqatay inaan muddo yar rooti ku heli karo.

Afar sano markay jasiiraddan iigu dhammaatay ayaan helay galley igu filan oo cuntadayda iyo beertayda cusub ii deeqda.

## 7. GARIIRKII JASIIRADDA

Haddaan wax walba illoobo marna ma illoobi kano maalintii ay Abriil toddoba ahayd ee sannadkii 1660kii. Waxay ahayd maalin daran oo aad u xun, waxaanan rumeystay inay aakhiradaydii soo dhowaatay oo ay geeridaydii maalintaas tahay, hawshii aan intaas soo wadayna ay ilbiriqsi qura hortayda ku baabi'i doonto.

Si dhab ah ayaan maalintaas shaqadaydii cuslayd ugu dhex jirey, waxaanan ku shaqeynayey buulcawskaygii dhexdiisa. Anigoo sidaas ah ayaan arkay dhulkii oo marna kor u kacaya, marna hoos u degaya, waxaanan dareemay qirarka igu wareegsan oo dhaqdhaqaaqaya, qarax iyo hugun daranna waan maqlay. Cabsi baa rabbi ii keenay, maxaa yeelay ma aqoon halka ay balaayadani ka soo fufayso. Waxaan ka baqay anigoo nool inaan xabaalmo, markaas baan arkay jasiiraddii oo si xoog leh u ruxmaysa. Waxaan ogaaday inuu gariir yahay.

Saddex jeer oo isku xigta ayuu dhulku gondahayga hoostooda ka gariiray, mar walbana waxaa u dhexeeyey siddeed daqiiqadood. Ruxadkaas oo ahaa mid aad u xoog badan wuxuu soo jiiday in qar weyni meel agtayda ah ku soo dhaco, halkaas uu ku soo dhacayna waxaan u jirey wax aan mitir iyo bar ka badneyn. Shanqar aan onkod laga aqoon ayaa soo dhiciddiisa ka dhalatay, markaas buu hadalkii iga soo bixi waayey cabsi daraaddeed, dhiigeygiina baqdin awgeed ayuu xididdada ku joogsaday.

Nasiibkayga dhulkii baa degey, saddexdii gariir ka dibna sidiisii horuu ku noqday, markaas bay naftaydii

xoogaa xasishay, ha yeeshee waan ku dhici kari waayey inaan buulcawskii ku laabto. Markaas baan gegi bannaan fariistay, anigoo wax aan sameeyo garan la'.

## 8. GARDRKII KA DIB

Cirkii ayaa madoobaaday, waxaana si lama filaan ah uga soo buuxsamay daruuro mugdi ah oo biyaysan. Duufaan daran iyo dabayl wada socda ayaa iska soo daba dhacay. Baddii baa hugun kicisay, mawjadihiina fooddey isla galeen oo sida buuraha samada isku toleen.

Saddex saac oo aan kala joogsi lahayn ayay duufaantii dhacaysay, markaas bay degtay oo roobab badani yimaadeen ama da'een. Waxaan u qaatay daadad daruurta is-haysata ka soo burqanaya. Habeenkii oo idil iyo maalintii ku xigtay qaybteedii hore cirku roob ma kala joojin. Kolkaas baan bilaabay feker ah sidii aan gurigaas ku beddeli lahaa markuu gariirkii dhacay. Waan ku dhici waayey inaan meeshaydii hore sii joogo markaan ku sigtay inaan anigoo nool xabaalmo. Waxaan is iri, mar hadday jasiiraddani gariir halis u tahay, ma wanaagsana inaan godkaan guri ka dhigto. Waxaan u baahnahay in aan meel bannaan oo aan qarar lahayn goobto, si aan guri uga dhisto, heeraar wanaagsanna u yeesho.

Waxaan ka xumaaday ka tegiddii godka, maxaa yeelay hawl badan baa iga soo gaartay qodistiisii, hagaajintiisii, iyo alaabtaydii aan ku dhex nidaamsaday. Wuxuu ii ahaa aqal iyo qalcad adag oo aan la ii soo dhaafi karin hadduu cadaw i soo weeraro.

## 9. EELKII GARIIRKU REEBAY

Subaxdii bisha May kow ahayd ayaan inta kacay baddii daawaday oo goonyaheeda oo idil isha la raacay.

Waxaan arkay burburkii doonta iyo looxaanteedii oo intuu hirku soo tuuray xeebta ku soo tufayo. Waan u kaadiyey inta biyuhu ka noqonayaan oo uu hirku ka degayo. Markii hore waan ka yaabay, ka dibna waxaan ogaaday inuu gariirkii ku wacnaa oo ay mawjaduhu looxaanteedii xeebta ku soo halgaadeen. Waxaa igu habboonaatay intaanan dhismaha aqalka bilaabin inaan fursaddan ka faa'iideysto, markaas baan burburkii doonta cad cad u kala googoostay, anigoo huba inaan cad walba aad ugu baahan doono. Hawshaas fulinteeda waxaan ku jirey tan iyo bartamihii bishii Juun, looxaan badanna waan helay, qiyaasta laba boqol oo rodol oo bir ahna waan helay. Sidaas bay iigu suurtagashay saxiimad alaabteedu u idishahay.

Markaas ka dibna waxaan samaystay shabaag aan ku kalluumaysto. Kalluunka inta aan u baahanahay markaas mooyaane inta kale qorraxda ayaan ku qallajin jirey, si aan waqtiyo kale u cuno.

## 10. QANDHO KULUL

Bishii Juun lix iyo tobankeedii ayaan arkay diin weyn oo dhulka gurguuranaya, wuxuuna ahaa kii ugu horreeyey ee aan jasiiraddan ku arko, ha yeeshee maalmihii dambe waxaan arkay xayn xayn diiman ah oo dhanka kale jasiiradda kaga nool. Diinkii ayaan gawracay, wuxuuna ii ahaa cunto aan intaan noolaa cuno tii iigu macaanayd.

Maalintii ay bisha Juun siddeed iyo tobanka ahayd ayey roobab aad u badani da'een, hawadiina si degdeg ah u qabawday, markaas bay qandho kululi i qabatay oo toban beri oo dhan i karkarinaysay. Marna waan kululaanayey, marna waan qaboobayey, kolkuu oonku iga batay-

na tabardarro ayaan la aadi waayey halkii aan biyaha ka heli karey.

Markii aan caafimaad yar helay ayaan ku tashaday inaan biyo ka soo buuxsado qarsho weyn oo dul saarto miiska sariirta ku dhegan. Qandhadii ayaa xooggii iga siibtay oo dhulka i dhigtay, markaas baan toban beri oo kale iska jiifey, anigoo waxba qaban kari la'. Si fiican baan isku baxnaaniyey, mararna waxaan u bixi jirey tamashle iyo raaxaysi gaaban ilaa aan caafimaadkaygii oo dhan soo ceshaday shan iyo tobankii bishii «Luulyo».

## 11. SAHAMINTII JASIIRADDA

Waxay ila noqotay inay habboon tahay inaan jasiiradda sahamiyo oo wax alla waxa ku dhex jira ogaado. Markaas baan waxaan aaday gacankii yaraa oo ahaa meeshii ugu horreysey ee aan jasiiradda ka dego, waxaanna garab socday daanta balliga uu biyaha ku shubo, laba meyl ku dhowaadna waxaan ku soconayey dhul sare oo badda ka korreeya. Waxaan u bogay ruumanka dooggа leh ee quruxda leh ee siman ee balligu dhex- jeexo. Waxaan ruumanka sare ku arkay in badan oo ṭoombaakh cagaaran ah, kana baxay laamo dhaadheer, sidoo kalena waxaan arkay laamaha qasabka sonkorta oo si xun u koray markii dayac iyo dad la'aani ku dhacday.

Maalintii xigtay oo ahayd lix iyo tobankii isla bishaas ayaan maray jidkii aan shalayto maray oo ruumankii aad u sii dhex galay. Meel dambe ayaan ku arkay geedo khudrad iyo kuwo kaleba leh. Waxaan arkay batiikh iyo canab bislaaday oo iga yaabiyey, qalbigaygiina farax weyn geliyey. Markaas baan si tartiib tartiib ah khudraddii wax uga cunay, si aanan u daaco qurmin, dabadeedna aanan u jirran. Waxaa igu soo dhacday talo ah inaan canabka qallajiyo oo sibaab ka dhigo hawshaas

baan maalintii oo idil ku jiray, mana doonayn inaan qorrax-dhaca ka hor aqalkaygii ku laabto, maxaa yeelay, labada meelood way kala fogaayeen. Geed weyn oo caleemo ballaaran ayaan hurdadii habeenkaas u doortay oo dhex seexday sidii aan yeelay habeenkii ugu horreeyey ee aan jasiiradda soo degey. Hurdo macaan ayaan habeenkaas dhag iri, markuu waagu beryeyna intaan toosay ayaan afar mayl hore u sii socday. Ugu dambeystii, waxaan tegey keyn ubax leh oo ruuxii meel fog ka fiiriya ula ekaaneysa sidii beer gacan looga shaqeeyey.

Waxaa i jiitay wixii aan arkay oo ah geedihii burtuqaalka, liimada iyo kuwo kale oo giddi wada ah khudrad bisil oo aad u macaan.

Waxaa ila habboonaatay waxyaalahaas aan arkay oo cuntooyinka ah inaan wax meel ka dhigto, si aan ugu aayo xilliga qaboobaha ah ee dhow, canab badan ayaan soo gurtay, waxaanan ka soo lulay laamaha geedaha si uu cadceedda ugu qallalo, banbeelmadiina intaan ka soo qaadi karay ayaan ka soo gurtay, kaddibna aqalkaygii baan ku soo laabtay, anigoo aad ugu bogey, quruxda meesha, barwaaqadeeda, hawadeeda wanaagsan iyo berriinka wanaaggiisa. Markaas baan ogaaday rugaha jasiiradda rugta ugu liidataa inay tahay midda aan hadda degganahay, ha yeeshee, kuma tashanayn inaan dhanna uga guuro, maxaa yeelay, badda ayaa ku dhoweyd, mar walbana waxaan u toog hayn jirey doon i soo marta ama cid ii timaadda oo shibta iyo shimbiro-qalaanqasha aan ku noolahay iga samata bixisa.

Hase ahaatee, waan awoodi waayey inaan ruunkaas ka fogaado. Maxaa yeelay, waxaan la dhacay quruxda iyo bilicda uu la muuqday, markaas baan buulcaws yar ka samaystay meel ka mid ah oo bannaan, geeduhuna ay afarta gees kaga wareegsan yihiin, laba saddex habeen oo is-xiga ayaan halkaas ku dhammaysan jirey, wa-



xaanna u yeelay jaranjaro teydii hore u eg. Sidaas baan ku yeeshay laba aqal oo kala fog oo midba kolka aan rabo u hoydo ama u harsado, tan iyo bishii «Agoosto» kowdeediina caynkaas baan u noolaa.

## 12. XILLIGII ROOBABBOWGA

Afar iyo tobankii Agoosto ayuu roobkii xoog u bilowday, ha yeeshee, bartamihii Oktoobar ayuu soo yaraaday. Nasiib wanaag, gurigeygii hore ayaan geystey dhammaan wixii canab ahaa oo aan qallajiyey intaan xilliga roobabku soo gelin, dabadeedna markuu cirku hooray oo aan bixi kari waayey ayaan helay cunto igu filan oo i deeqda, maxaa yeelay, mararka qaarkood ayuu roobku igu qasbi jirey inaan dhawr maalmood godkeyga ku xirnaado.

Waqti yar kaddib ayaan darcemay inuu keydkeygii sii socdo, waxaa lagama maarmaan noqotay inaan aqalka laba jeer ka baxo. Orgi iyo diin weyn ayaan soo ugaarsaday, hilibkooduna aad buu u macaan badnaa.

Gacan canab ah ayaan ku quraacan jirey iyo hilib solay ah, cashaduna waxay ii ahayd laba ama saddex ukumood.

Maalintii ay ahayd soddonkii Sebtembar ayey xusuusi igu dhalatay oon ka xanuunsaday sida aan ku noolahay, gaar ahaan markay igu soo dhacday inay maanta sannadguuradii koowaad tahay oo aan sannad dhan jasiiradda musaafuris ku ahaa. Aad baan ugu feejignaa ilaalinta xilliyada iyo xisaabinta ayaamaha sannadka, si aanay roobabku iigu soo kedin, hawshii adkaydna waxaan ka helay waayo'aragnimo ballaaran xagga beer falidda, shaqadiina si wacan baan guul uga gaarey.

## 13. SHIMBIR QAAQLE IYO ORGI

Ma jirin maalin aan shaqada ka nasan jirey, had iyo goorna waan howllanaa. Marna kama daalin inaan cuntooyinka keydsado, weliba intaan xilliga roobabawgu

soo gelin. Ma rabin inay si kedis ah cuntadu iiga idlaato ama aan waayo haddii roobku inaan dibedda aado iga xayiro.

Waxaan u baahday dambiilo aan khudradda iyo cuntada ku dhawrto, taasna in kasta oo daal badina iga qabsaday, haddana waan ku guuleystay. Goor walba waxaan badin jirey dhex socodka jasiiradda iyo sahaminteeda. Maalin maalmaha ka mid ah ayaan arkay dhul ballaaran oo burco burco ah, hawaduna aad bay u wacnayd. Dhulkaasuna wuxuu u dhereraa galbeed ilaa koonfur-galbeed, jasiiraddeyda wuxuu ka fogaa qiyaastii shan iyo toban meyl. Wax aan ka garanayey ma jirin, ha yeeshee, markaan in badan fekerayey waxaan gartay inuu dhereran yahay ilaa dalka «Baraasiil». Bannaankaas doogga leh ee quruxda badan ee geedaha dhaadheer leh intaan dhex marayey waxaan arkay koox shimbiro qaaqle ah.

Waxaan ku guuleystay inaan middood soo dabto. Ul baan ku dhuftay, dabadeedna baalka ayaan gashaday, kuna kululeeyey ilaa ay soo miyirsatay. Gurigeygii ayaan keensaday, markaas baan arkay eygii oo orgi yar ii soo ugaaray. Intaan degdeg ugu rooray ayaan orgigii miciyadiisii ka saaray, kana fujiyey.

Waxaan ku dadaalay shimbir qaaqlihii iyo orgigii inaan rabbeeyo oo hebed ka dhigo, markaas baan orgigii tiir ku dhaaday, shimbir-qaaqlihiina buul u sameeyey. Waqti yar kaddib way ii hebdeen, la jooggeygana jeclaadeen. Meel alla meeshaan aado ayuu orgigii ii raaci jirey, mana uu awoodi karin inuu iga haro ama i sugo.

Si weyn baan ugu liibaanay, uguna farxay labadaas saaxiib oo cusub haysashadooda, sidaan ugu liibaanay saaxiibnimada eygeyga iyo labadeyda bisadood oo hadda ka hor ila joogay.

# *Fasalka Lixaad*

# XILLIGII KELINIMADA

## 1. CADAWGA BEERAHA

Waxaa timid maalintii soddonaad ee bisha Sebtembar oo ku beegan sannadguuradii labaad, kana soo wareegtay maalintii aan cagaha soo dhigay jasiiradda waaqlaha ah oo fogaanta badan, halkaas oo la ii qaddarey inaan adduunka ka tago oo aan kelinnimo iyo mugdi ku noolaado. Ha yeeshee, shaqadii aan had iyo goor faraha kula jirey ayaan raaxo weyn ka helay, guulna waan ka gaaray markaan, dadaalkayga, samirkayga iyo hawlkarnimadeydaba la kaashaday.

Xilligii goosadka dabayaaqadiisii ayaa galley badani ii soo gacan gashay, laakiin raynraynteydii siima ay dheeraan, maxaa yeelay, orgidii jasiiradda ayaa iiga cayaaray. Waxaan arkay xayawaan aan bakeyle buureedka laga aqoon oo abuurkeygii baabi'inaysa. Sarreenkii oo weli laanta saaran ayaa la fiicnaaday, markaas buu macaankii jiitay, dabadeedna baabah buu ka dhigay. Wa-

xaa igu qasab noqotay inaan beertii oodo dhaadheer hareeraha uga dhigo, taasina waxay igu qaadatay saddex toddobaad oo gaw ah. Dharaartaas oo dhan dacawgaas baan la dagaallami jirey, habeen markay noqotana eyga ayaan inta xarig ku dhaado iridda beerta kula qaban jirey. Habeen oo dhan buu qeylin jirey ilaa ay ruunkeygaba ka huleeleen. Mar dambe uma ay soo dhowaan, aniguna waan ka reystay siday abuurkayga ugu ciyaari jireen, ha yeeshee, xilligii goosadku markuu soo galay ayey cadawyo kale ila soo derseen, waxaa soo baxay shimbiro sabuulka galleyda huf ka dhigaya oo inta macaansaday aan lagaba soo gaarin karin. Ha yeeshee, la dagaallankooda kama aan quusan, habeen iyo dharaarna heegan baan u ahaa inaan agagaarka beertayda ka eryo. Shimbirkii soo dhowaadaba xabbad baan ku sayri jirey ilaa argagax ku wada dhacay oo ay cabsadeen, dabadeedna laga waayey beerta iyo meel u muuqata midna. Sidaas baan uga guuleystay, laabtayduna ku degtay, wixii aan abuurtayna waxay bislaadeen ayaamihii bishii Sebtembar ugu dambeeyey.

## 2. QALABKA BEERAHA

Markaan ku dhaqaaqay inaan goosto tacabkii ii bislaaday ayaan walaacay oo ka welwelay qalab la'aanta i haysata, maxaa yeelay, ma haysan wax alaab ah oo aan ku shaqaysto. Waxaa ii muuqday inay lagama maarmaan tahay inaan sameysto gaalleefta birta ah oo abuurka lagu jaro.

Gaalleeftaas waxaan ka sameeyey seef iyo laan aan geed ka jaray. Intaan sabuulkii soo jaray ayaan gacmahayga mirihii kaga soo jafay, kaddibna waxaan ku tashaday inaan xilliga soo socda dhulka ku wada rido, si ay iigu badato. Halkan bay iiga muuqatay inta ay le'eg tahay dhibaatada qofka soo gaari kartaa haddii uu isku



dayo inuu keligiis cad rooti ah sameysto. Waxaan u baahnaa yaambo, faas iyo alaabada kale ee waxbeerashada lama huraanka u ah, markii aan wax goostana waxaan u baahnaa maxdin, mookhal, foorno iyo waxyaalo la mid ah sida milixa oo kale. Ha yeeshee, dadaalka iyo samirka badan ayaa dhibaato kasta lagaga adkaan karaa, wax alla wixii aan rabayna way ii meel mareen, iyadoo ay ku wacnayd geesinnimadii aan hawlaha u guda geli jirey, maxaa yeelay, waqtigayga marna cidla iyo ciyaar toona kuma aan lumin. Marka ay roobabku da'ayaan gurigeyga ayaan joogi jirey, shimbir qaaqlahaygana hadalka ayaan bari jirey ilaa aan taasna guulo waaweyn ka dhaliyey.

## 3. SAMAYNTA WEELASHA

Tab iyo xeeli waxay ka dhashaan baahida uu qofku hadba qabo, sidaas daraaddeedna, anigoo markaas horteed isku deyin ayey igu qasabtay inaan weelal sameysto. Markaan muddo dheer wadey oo tijaabooyin badan soo maray ayaan ugu dambeystii ku guuleystay inaan sameeyo jalxado, weelal, daasado, qasacado iyo suxuun. Maalinba maalintii ay ka dambeysay sidaan hadba wax isugu dayayey waxaan aakhirkii gaaray heer aan hambalyo ku muteysan karo.

## 4. SAXIIMADDII WEYNEYD

Hawlahaas oo badan oo dhibta lihi ima ay illowsiin sahamintii jasiiradda iyo ogaanshaha dhulka iyada ku qabsan ee aan hadda ka hor arkay. Waxaan ka rajo qabay inaan helo tab meel mar ah oo LONDON igu celin karta.

Waxaan xusuustay saxiimaddii doonta, markaana fiirfiiriyeyna waxaan arkay iyadoo afku u hooseeyo oo xeebta ag taal, in ka mid ahina ay camuudda ku dhex qarsoon tahay. Waxaan isku dayey halka ay taal inaan ka soo jiido, ha yeeshee, xooggeygii oo dhan cidlüu ku dhacay.

Jirdaha geedaha ayaan miciin biday muddo dheerna waan ka shaqaynayey ilaa aan ugu dambeystii ka sameeyey saxiimad weyn oo lix iyo labaatan rakaab ah qaadi karta.

Ha yeeshee, waxaa igu cuslaatay sidaan badda ku geyn lahaa, xeel aan halkeeda kaga dhaqaajiyana waan



garan waayey. Saxiimaddii hore ee doonta sidaan dhanna ugu riixi waayey ayaan middanna u riixi waayey.

## 5. SAXIIMADDII CUSBAYD

Sannad afraad markuu ii dhammaaday ayey hawlahaygii si fiican oo habsan isugu key dubbo dhaceen. Alaabtii aan sameystay waxaa ka mid ahaa cimaamad weyn oo ka samaysan dhogorta orgiyada aan ugaarsado. Isla dhogortaas waxaan ka sameystay shulug dheer, sarweel iyo dhar kale oo aan qabowga dayrta iyo gabadana-



da isaga celiyo. Waxaan kaloo sameystay dallad aan kuleylka diraacda kaga gabbado, maxaa yeelay waxay jasiiraddu lahayd huur iyo hanfi aan loo adkeysan karin, sababtoo ah iyadoo dhul baruhu ag mari jirey. Dalladdaasi waxay ii fududeysay inaan dharaartii dhib la'aan ku saqaafo, roobka iyo qorraxdana waan kaga nabad geli jirey. Wixii markaas iigu darraa ee aan ka fekeri jirey waxay ahaayeen sidii aan ku sameysan lahaa saxiimad teydii hore ka yar. Sannadkii 5aad intuusan ii dhammaan ayaan sameynteedii faraha ka qaaday, si wanaagsanna ugu

guuleystay. Intaan shiraac u yeelay ayaan dallad weynna ku rakibay. Waxaan goostay inaan jasiiradda dhan walba ka arko, anigoo rabay boqortooyadaan ay waayuhu ii garteen inaan boqorkeeda noqdo ama haddii si kale oo ka saxan loo yiraahdo jeelkaan la igu xukumay inaan ahaado qofka qura ee ku xiran ama ku hoyda.

Sidaas baan socdaalkaas ugu diyaarsaday cuntadii iyo biyihii aan ugu baahnaa, mana illoobin in aan qaato 'hub aan isku daafaco haddii ay dhacdo oo ay halisi ila soo deristo. Inaan jasiiradda soo afmeero ayey talo iiga dhammaatay, inkastoo aan in badan taladaas ka walaacay ama shaki iga galay.

## 6. DAWAAFKII JASIIRADDA

Maalintii ay bishii Nofembar ahayd lix ayaan dawaafkaas bilaabay, markaasna lix sano ayaa iigu idlaatay boqortooyadeydii ama jeelkeygii haddii aan runta u beyro!!. Ha yeeshee, dalxiiskaas ama socdaalkaas muddadii aan ugu talo galay wuu ka dheeraaday.

Halis badan iyo dhibaatooyin xoog leh ayaa dawaafkaas iga soo gaarey, waxaanse ku ladnaa Ilaah baa i garab joogey, galab galbaha ka mid ahna, anigoo daal u go'aya, ayaan aqalkaygii nasashada ku soo laabtay, markaas baan hurdo macaan dhag iri.

## 7. KEDISADII SHIMBIRTA

Waxaa amakaag igu riday cod aan si kedis ah ku maqlay oo magacayga si cad ugu dhawaaqaya, isagoo leh:

«Robinson» Waryaa Robinson! Alla waa Robinson! Miskiin Robinson! Ku mee! Halkee baad ku maqnayd! Hadda sidee baad tahay Robinson Kuruuzuu».

Inaan dheelallow iyo riyo ku jiro ayaan isu qaatay, ha yeeshee, intaan weli yaabka ku jirey ayaan maqlay codkii oo haddana leh :

Robinson! Waryaa Robinson! Markaas baan hurdadii ka baraarugay, anigoo yaab iyo irkig madaxa la qaadi la'.

Kol dambe ayaan ogaaday halkii uu codku ka soo baxayey, markaas baana degganaansho iyo xasil iigu horreeyey, waxaan ogaadey shimbirtaydii oo heeraarka aqalka taagani inay codka lahayd. Markaas baan la yaabay sida ay meeshaan u soo aqootay, maxaa yeelay, waxaan uga soo kacay godkeygii hore. Anigoo garan la' waxa halkan keenay iyo sababta ay u soo dooratay ayey igu soo orodday oo suulka iiga istaagtay, iyadoo su'aasheedii ku celcelineysa oo la kulankeyga aad ugu faraxsan. «Robinson, halkee baad ku maqnayd? Halkee baad miskiin yahow ku maqnay?».

Waxaan u xambaartay xaggaa iyo godkeygii, halkaasoo aan sannad ku dhowaad sidii qof xiran ugu noolaa, mana jirin wax raaxadayda iga kala dhantaalayey oo aan ahayn fogaanta jasiiradda iyo wehel la'aanteeda.

## 8. UGAARSIGII RIYAHA

Farsamooyin badan ayaan bartay, si wanaagsanna waan ugu xeel dheeraaday. Waxaan guul ka gaaray sameynta weelasha iyo dambiilaha. Riyaha iyo diimankana markaan u baahdo ayaan ugaarsan jiray. Waxaan dareemay baaruuddii aan keydsaday inay sii yaraanayso, markaas baan ka baqay inay iga dhammaato oo aan hadhow xoolaha ugaarsigooda daaqad u waayo.

Inaan qorshahayga wax ka beddelo ayaa lagama maarmaan noqotay, markaas baan dabin dhigtay si ay ri' nooli iigu soo dhacdo. Dabinnadeydii aan haystay ma

ahayn kuwo ugaarsiga ku habboon, sidaa daraaddeedna, ridii ku dhacday way ka baxsatay, sababtoo ah xargihii aan ku talo galay oo jilicsanaa. Xeel kale ayaan u leexday.

Ruumanka ay riyuhu badanaaba daaqaan ayaan boholo hoos u dheer ka qotay oo geedo aan soo guray dusha ka saaray, ciidna ku dul shubay. Sabuulka bariiska iyo midka galleyda ayaan ka ag beeray. Xeeshaasina sidii tii hore ayey ii suurtoobi weyday, maxaa yeelay, riyihii baa agagaarka ka baynuunay. Hase yeeshee, waqti yar way ku sirmeen, waxaana boholihii midkood ku dhacay orgi farow ah, oo aan ku guuleysan waayey inaan dejiyo ama sirsiro. Dabadeedna waan iska sii daayey, inkastoo laga yaabi lahaa inuu dego oo rabbaayad ii noqon lahaa, haddii aan dhawr beri bohosha u deyn lahaa ilaa ay gaajadu dubato. Fikraddaas wanaagsani waxay igu soo biirtay mar ay talo farahayga ka baxday.

Markaas ka dib ayaa laba god oo kale waxaa iigu dhacay laba ceesaamood iyo orgi yar, aniguna aqalkaygii ayaan u kaxaystay. Kolkii hore inay wax cunaan wey diideen, gadaalkiise intay gaajadii carbisay ayey qasab ku noqotay inay marsadaan dhammaan galleydii iyo bariiskii aan u soo dhigay. Waxaan ku dadaalay inaan u sameeyo dhul daaq fiican leh, heeraar adagna waan u yeelay, si aan cararidi ugu suuroobin.

Cuntooyinka ay jecel yihiin ayaan goor walba siin jirey sida sabuulka galleyda iyo bariiska ilaa ay hebed ii noqdeen oo intaan xarkihii ka furay ay iga carari waayeen. Meeshii aan aadaba way ii raaci jireen, mar alla markay i arkaanna way igu soo ordi jireen, iyagoo qaylinaya. Sannad iyo bar ka dib ayaan yeeshay xayn ari ah oo aan laba iyo toban orgi iyo riyood ka yareyn. Tirsigaasina waayo ka dib wuu ii labanlaabmay, noloshay-

diina waxay soo baxday mid barwaaqaysan oo aad u wacan. Caano badan ayaan riyahaas ka heli jirey, taasoo ii suurtogelisay inaan farmaajo iyo burcad sameysto, anigoo aan markaas ka hor dibnaha saari jirin.

Tababar iyo carbis adag sidaan hawshaas naftayda ugu siinayey ayaan ku xeel dheeraaday. guul weynna waan ka gaaray.

## 9. ROBINSON SAAXIIBBADIIS

Miiska qadadayda waxaa maalin walba ka buuxi jirey cuntooyin badan oo kala nooc nooc ah, saaxiibbadayda daacadda ahna aad baan ugu reeyey. Shimbirtu way ila fariisan jirtey, labada bisadoodna iyagoo iska soo horjeeda ayey bidixda iga fadhiyi jireen. Hadda ka horna wuxuu akhristuhu ogaaday inaan doontii laba bisadood kala soo degey, haddana ha ogaado inay beri hore labadiiba dhinteen markey bisado badan dhaleen. Labada hadda ii joogta oo keliya ayaa daacad iiga noqotay, intii kalana waxay noqdeen wax inkaaran oo dhagar badan wax alla wixii ay cunto arkaanna jug ka siiya. Markaas baan aqalkaygii si xun uga buubiyey ka dib markaan dhibaato u geystey, ayey keyntii u carareen, wax yar markay joogeenna waxay la soo baxeen dabeecadda dugaagnimada ee ay hiddaha u lahaayeen.

## 10. DHARKII ROBINSON

Waxaa suurtowda inuu akhristuhu u jeelay in uu ogaado dharkii aan qaadan jirey mar alla markii aan damco inaan boqortooyadeyda dhex mushaaxo. Haddana bal aan dharkaas yaabka leh uga sheekeeyo :

Cimaamaddeyda oo aan harag riyaad ka sameeyey waxay lahayd dabo dheer, dacalkeeduna dhabankeyga ayuu ka raaracay, si ay hunriga qorraxda iiga hoosiso.

Surwaalkeygu wuxuu ka sameysnaa harag aan ka bixiyey orgi duq ah, timaha ku yaallaana ilaa jilibka ayey ka laalaadeen.

Suunkeyga oo isna harag ari ka sameysnaa ayaan miinshaar iyo golxob ku xirtay, garabkana waxaan suran jirey qoriga, dhabarkana dambiil weyn ayaan saaran jirey, taasoo aan cuntadeyda iyo waxa aan cabbayo aan ku guran jirey. Gacantana waxaan ku sidan jirey dalladdeyda oo kulka qorraxda iyo roobabka aan isaga celin jirey.



# *Fasalka Toddobaad*

# JIMCE

## 1. RAAD DAD

Maalin maalmaha ka mid ah, anigoo soconaya ayaan arkay raad dad oo si fiican ciidda uga muuqda, markaas baan aad u cabsaday, waanna xasili waayey sidii qof cirka looga yimid oo danab ku dhacay.

Anigoo degi la' ayaan hareerahayga eegay, dhegtaydana waan furay, saan cidna waan arki waayey, codna waan maqli waayey.

Burco dheer intaan fuulay ayaan afarta jaho isha la raacay, ha yeeshee, waan arki waayey wax muujin kara inay dhulka cidi ila joogto. Waxaan is-iri: «War malaha waad riyooneysaa», ha yeeshee, raadkii aan arkay ayaa shaki oo dhan ii diidey. Farihii cagta iyo ciribtii ayaa si wanaagsan dhulka ugu sawiran, markaasna waxaan rumeystay inaanan riyo ku jirin. Godkeygii ayaan ku orday, sidii iyadoo ciidan mahiigaan ihi uu i eryanaa-



yo. habeenkaasuna wuxuu ii ahaa habeen baas oo welwel igu dhaafay, ilaa waaberigiina cabsi awgeed, ayaan il iyo baal isla saari waayey.

Saddex maalmood oo dhan ayaan aqalkayga ku oodnaa, ka dibna gaajaa igu qasabtay inaan u baxo aqalkayga kale ee aan geedaha canabka ka dhex dhistay.

## 2. FEEJIGNAAN

Raadkii aan arkay wuxuu igu dhaliyey yaab iyo amakaag, wax aan qabtana waan garan waayey. Shan iyo toban sano oo gow ah ayaan jasiiraddan ku noolaa, welina cid kuma aan arag. Maanta ayaan raad dad arkayaa!! Sow wareer ma aha ?

Waxaan is-iri: «Waxaa dhici karta qaaradda igu dhaw dadyowga ku nool qaarkood inay jasiiraddayda booqasho ku yimaadeen, hase ahaatee, markay arkaan inaysan degid ku habboonayn ayay ka tegi doonaan».

Inaan feejignaado ayaan ku tashaday, si aan cadowgu kedis iigu soo gelin, dabadeedna godkeygii ayaan si fiican bannaanka uga ootay, aqalkaygii kalana dhacamaha ayaan u adkeeyey.

Mar kasta oo aan guriga gelayaba waxaan ku geli jirey laba jaranjaro. Markaan dusha tago ayaan jaranjarada hore kor u soo qaadi jirey oo qar aad u sarreeya dul dhigi jirey, si aan cidina awood ugu yeelan inay i soo gaarto ama qalcaddayda iigu timaaddo. Laba sano ayaan sidaas ku dhammaystay ilaa aan is-iri: «Allaylehe khatar waad ka nabad gashay».

## 3. RAADKII DAD-QALATADA

Maalin maalmaha ka mid ah anigoo siday caadadaydu ahayd, jasiiradda dhex saqaafaya oo meelaha aanan weli arag soo baro is-leh ayay ishaydii ku dhacday dad dugaagoobay raadkood. Markaas baan argagaxay oo cabsiyi igu dhalatay. Waxaan hubsaday galtidaas dugaagga noqotay inay xeebta koonfur galbeed ee jasiiradda u soo kaxaystaan dadka ay dagaalka kaga adkaadaan oo ay soo qafaashaan, dabadeedna intay hilibkooda

dabka ku solaan ay cunaan. Waxaan arkay lafo iyo xubno aadane oo inta la feentay ku kala daadsan meelo u dhaw dambaskii badnaa ee dabku reebay.

Anigoo wixii aan soo arkay aad uga xun murugo weynina iga hayso ayaan gurigeygii dib ugu soo noqday, waxaana markaas ii caddaatay raadkii dadka ee aan labada sano ka hor la kulmay inuu ahaa raadka dad-qalatadaas. Xoogaa bay nafteydii degtay, inkastoo ay taasi cabsi iyo walaac igu dhalisay.

Waxaa i dhacday sababta ay dad-qalatadu jasiiradda u soo booqdaan. Kolka ay dagaal dad la galaan oo ay qaar soo qafaashaan ayay halkanna la soo aadaan. Cunto iyo dabbaaldeg wada jira ayey kol walba oo ay wax soo helaan u imaan jireen.


Siddeed iyo toban sano ayaan meesha hadda ku noolaa, welina mid ka mid ah lama aan kulmin, sidaas daraaddeedna wixii aan arkay markaan arkay ayaan ka digtoonaaday oo isu diyaariyey inaan goor walba indhaha furo, rikaab-ku-joogna ahaado.

## 4. DABBAALDEGGII DAD-QALATADA

Anigoo markaas saddex iyo labaatan sano jasiiraddan joogey, bishuna ay Disembar tahay ayaan aqalkaygii aroortii ka baxay si aan u soo goosto tacabkii aan beertay. Kolkaas baa xeebta agteeda iftiin iiga muuqday, waxayna meeshaasi gurigeyga u jirtey hal meyl barkiis. Waxay ahayd markii iigu horreysay ee aan meeshaas dad-qalatooyin ku arko. Cabsi iyo argagax baa dhan walba iiga yimid, dabadeedna gadaal iyo aqalkaygii ayaan u cararay oo intaan sallaankii raacay halgan iyo is-daafac u dhar dhigtay.

Laba saac ayaan cadowga dhowrayey, dabadeedna markaan intaa wax ka badan fadhiyi waayey ayaan inta labadii jaranjaro qaatay qarka dushiisa u baxay oo dhulka is-goglay. Xoqaddii aan haystay ayaan ku eegay, mise waa sagaal dad-qalato oo dab ololaya si garangar ah ugu weegaarsan, si ay ugu hogeystaan dadkii ay soo qafaasheen ee ay jasiiradda u soo kaxaysteen.

Dad-qalatadu waxay ku yimaadeen laba saxiimadood oo ay xeebta soo dhigteen, waxayna sugayeen ilaa inta ay hirarka baddu taag-darraynayaan, si ay kolkaas dib ugu laabtaan. Waxaan ogaaday waqtiyada hirka culusi jiro oo ay baddu berriga afka soo saarto inaysan saxiimadda fuulin, markaas baana xasillooni iigu horreysey. Anigoo cabsi la' ayaan jasiiradda iska dhex mushaaxayey, hase yeeshee, markay biyaha baddu dib u noq-



daan ayaan digtoonaadaa oo ka feejignaadaa halis si kedis ah iigu timaadda. Muddo dheer markay ciyaar tumanayeen ayey labadii saxiimadood fuuleen oo gadaal iyo halkay ka yimaadeen u noqdeen. Markay indhahaygii ka qarsoomeen ayaan ku orday meeshii ay fadhiyeen. Wax iga nixiya ayaan ku arkay golihii ay ka dabbaaldegayeen, waxaan arkay lafo dad oo dabkii agihiisii ku kala firirsan, markaas baan, carooday oo dhirif keliya ilkihii is-dhaafsaday ,kana dhiidhiyey naxariis darrada aan goobtaas ku arkay. Waxaan goostay inaan dhegta dhiigga u daro midka ugu horreeya ee aan dad-qalatadaas ka arko.

## 5. BADBAADADII KII LA SOO QAFAASHAY

Muddo dheer ayaan ku tashanaa la dagaallanka dad-qalatada, ha yeeshee, intii siddeed iyo toban bilood ah ayaanan mar dambe il iyo baal saarin.

Dabadeed, goor waaberi ah ayaan lix saxiimadood xeebta ku arkay, markaas baan ogaaday intii la socotay inaysan kolba soddon ka yarayn, qalcaddaydii ayaan ku laabtay, xoqaddaydiina waan ku fiiriyey, mise tirsigoodu waa intaan awel ku hilaadiyey. Wax kastaba ha iga qabsadeenee waxaan goostay inaan la dagaallamo. Iyagoo aad u faraxsan oo cayaaraya ayaan arkay. In yar ka dib ayay laba qofood oo ay soo qafaasheen isa soo ag joojiyeen. Mid bay kow uga siiyeen, kii kalana intay saaxiibkii ku hawllanaayeen ayuu cagaha wax ka deyey. Intii uu ordi karayey ayuu orday, waxaana ka soo daba gannaa saddex dad-qalatada ka mid ah, hase ahaatee, way qaban waayeen.

Gacan yar ayuu hariyey, markaas buu isku tuuray oo si la yaab leh u dabaashay ilaa uu qarkii kale ka kudey, umana uu dan gelin hirkii dheeraa iyo cartanka maw-

jadaha. Laba dad-qalatadii ka mid ah ayaa ka hari waayey, kii saddexaadna saaxiibbadiis ayuu ku laabtay.

Waxaan arkay inay suurogal ii tahay sidii aan ninkaas khatarta ku jira ku badbaadin lahaa, maxaa yeelay, waxaan si xoog leh ugu baahnaa adeege iga taageera nolosha adag ee aan ku joogo jasiiraddan waaqlaha ah ee haddana fogaanta badan.

Anigoo qorigaygii gacanta ku wata ayaan xaggoodii u orday, markaas baan kii la eryanayey ugu baaqay inuu joogsado, wuuse i aammini waayey, inuu ii soo dhowaadana wuu ka baqay, wuxuu ii qaatay cadowgiisa inaan ka mid ahay, markaas baan labadii dad-qalato oo isaga raacdeynayey midkood feer xoog leh ku qaaday, dhulkuuna is-bilqay. Kii kale ayaa damcay inuu fallaar igu soo gano, markaas baan kala hor maray oo xabbad markiiba dishay keebka u taabtay.

Ninkii la eryayey ayaa markaas is-taagay, isagoo ka argagaxay jugtii rasaasta ee uusan markaas ka hor weligiis maqal. Waxaan ugu baaqay inuu ii soo dhowaado, markaasuu isagoo shakisan, xoogaa lug dambeediyey, mar labaad ayaan u baaqay, dabadeedna inta cabsidii ka badatay ayuu tallaabo tallaabo horey ugu soo dhaqaaqay. Wax yar markuu soo socdaba wuu joogsadaa, isagoo si la yaab leh u gariiraya. Mar saddexaad ayaan u baaqay, anigoo isku deyey inaan dejiyo oo cabsida ka bi'iyo.

Wuu soo dhaqaaqay ilaa uu agtayda yimid oo isagoo baryootamaya, ishana canka ka lulaya rakooc la jilba jabsaday. Farax iyo soo dhoweyn ayaan u muujiyey, dabadeedna intuu si buuxda wejiga dhulka ugu dhoweeyey ayuu cagta iga shumiyey. Sidaan isu jecleysiinayey oo aan isugu debcinayey ayaan cabsidii iyo werwerkii ka saaray.

Godkeygii ayaan u kaxeeyey, cunto iyo biyana waan ka dhergiyey. Xashiish meel gees ah dhoobnaa intaan u tilmaamay ayuu gogol ka dhigtay oo dug yiri.



Sidaas buu xilligii kelinnimadu ku dhammaaday, maanta laga billaabana waxaan yeeshay saaxiib aammin ah, daacad ah, geesi ah, dhallinyaro ah, oo aan da'diisu shan iyo labaatan sano ka weyneyn. Wuxuu ahaa adeege firfircoon, garaad badan oo haddana dabeecad wanaagsan.

Saacad barkeed ma uu hurdin markuu baraarugay oo uu godkii si degdeg ah uga soo baxay. Wuxuu ii yimid, anigoo ri' maalaya, markaas buu cagtayda madaxa saartay isagoo i dareensiinaya inuu ii yahay adeege daacad ah oo aan innaba amarkayga jebinayn, wixii aan u dirana judhiiba ku dhaqaaqaya. Qalbigaygii intaan u furay ayaan u jeestay oo isku deyey inaan saaxiibnimo tuso, markaasuu igu kalsoonaaday, kana ba'een shakigii uu iga qabay iyo wahankii laabtiisa jiifay intaba.

Intaas ka dib waxaan aad ugu dadaalay sidii aan afkayga ku bari lahaa, si aan isu af-garanno. «Jimce» ayaan ugu magac bixiyey, maxaa yeelay, maalintii aan geerida ka badbaadiyey ayaa Jimce ahayd, waana maalintii isaga iigu horreysey. Waxaan ugu baaqay in uu «Abbaan» iigu yeero, erayga haa iyo mayana waan baray. Kolkaas baan dhiil soo bixiyey oo caano ka buuxiyey oo intaan cad rooti ah dhex geliyey cunay. Waxaan ugu baaqay inuu sidayda oo kale u cuno, isna kama waaban inuu i jilo oo tabtii aan yeelayey uu yeelo.

Cuntadaas intuu macaansaday ayaa wejigiisii farxadi ka muuqatay. Waxaan u sameeyey dhar kayga la mid ah iyo cimaamad aan harag bakayle ka wesharay. Maalintii xigtay ayaan godkayga meel u dhow uga dhisay meel uu seexdo, maxaa yeelay, waxaan ka cabsanayey in ay dugaagnimadii ku soo noqoto oo anoo jiifa uu i dilo, dabadeedna i cuno.

Ha yeeshee, beryihii aan wada joognay ayaan ka ogaaday inuu daacad yahay oo aan anigu gefsanaa. Markaas baan feejignaantii badnayd iska dhaafay, oo wixii shaki ah oo aan ka qabay ay iga baaba'een. Sidii wiil iyo aabbihiis ayuu ii dhawri jirey iigana dambeyn jirey, wuxuuna diyaar u ahaa inuu naftiisa igu furto. Sidaas baan ku soo dhaafnay waqtiyo badan oo deggenaansho iyo raaxaba leh.

Maalin maalmaha ka mid ah aniga iyo «Jimce» oo kaymaha qaarkood dhex saqaafayna ayaan orgi meel maraya xabbad ku riday oon dilay. Jimcana markuu arkay



orgigii oo galgalanaya, aniguna aan in badan ka fogaa ayuu cabsi la gariiray, oo uu qufac iyo hindhiso kala joojin waayey. Waxaa ka yaabiyey jigtii xabbadda, markaasuu dharkiisii ka dhex raadiyey, isagoo ka baqaya in ay ku dhacday, warna uusan u haynin. Markuu ogaaday in aan waxba gaarin ayuu gondahayga qabsaday igana durraantay inaanan dilin. Mar labaad ayaan qaboojiyey oo madaxa u salaaxay, uguna baaqay inuu orgiga noo soo walwaalo. Ka dib, waxaan tusiyey qorigeygii, waxaanan ku liishaamay shimbir geed noo dhow saarrayd, inaan rabo inaan toogtana waan u sheegay. Mar alla markuu codkii xabbadda maqlay ayay cabsidiisii badatay, maalintaas ka gadaalna baqdin buu la gariiri jirey kolkii uu qoriga indhaha saaro.

Maalmaha qaarkood qoriga ayuu la hadli jirey, isagoo si boohin iyo liidnimo leh uga baryaya inuusan dilin oo siduu qayrkiis nafta uga qaaday uusan isaga uga qaadin!!.

Habeenkii markuu soo galay ayaan orgigii haragga ka baxshay oo dab ku hogeeyey, Jimcana hilib ka siiyey. Intuu dhadhansaday ayuu la macaanaaday, maalintaas ka dibna waxaa la xumaaday cunista hilibka dadka, cunto ahaanna kol dambe afka uma uu saarin.

## 7. HAWLKARNIMADII JIMCE

Beryihii xigeyba waxaan «Jimce» ku tababaray tacabka dhulka iyo hawlaha beerista. Waxaan baray sida galleyda dambiilaha loogu shubo, sida loo shiido, sida cajiinka looga sameeyo, rootiga iyo muufadana looga waxeeyo. Waqti yar ka dibna wuxuu muujiyey karti iyo fahmo ballaaran, wuxuuna yeeshay awood uu kaga soo dhalaalo. Wuxuu ii noqday gacantaydii midig, sababtoo ah caqligii Ilaah siiyey iyo daacadnimadiisii iyo hawlkarni-

madii uu ku galladaystay. Farxad iyo laabsamaan ayaan ku noolaa tan iyo maalintii uu taageerahaas garaadka badani wehelka ii noqday. Alaabooyinka aan u baahanahay ayuu magacyadoodii bartay, jaadadka iyo abuurka jasiiraddana aad buu ugu xeel dheeraaday, markaasuu dhib badan iga furtay, ii raaxeeyey oo wehel midka ugu wanaagsan ii noqday.

## 8. DALKII «JIMCE»

Maalin maalmaha ka mid ah ayey sheekadii dalkiisii nala gashay, markaasaan weydiiyey habka lagu gaari karo iyo qofka badda ku dhoofaa inuu dhexda nabadgelyo ku dhaafayo iyo in kale. Wuxuu ii caddeeyey si dalkiisa lagu gaaraa inay fududdahay, dabadeedna wuxuu ii galay tilmaamaha iyo wanaagga uu dalkiisu leeyahay. Isagoo ay ka muuqato inuu aad u jecel yahay, jeelna u hayo. Wuxuu ii sheegay inay dad caddaan ahi deggan yihiin galbeedka dhulkooda, markaas baan ogaaday in uu qoomanka Isbaanishka ah u jeedo, jidka loo maraana uu aammin yahay. Albaabka yididiilada ayaa ii ballaqmay, waxaana ii caddaatay xilligii aan jasiiraddan ka amba bixi lahaa inuu soo dhowaaday. Waxaan goostay inaan isu diyaariyo socdaalkii aan qoonkaas ugu tegi lahaa, halkaasoo ay iiga suurogeli karto sidii aan dalkeygii ugu noqon lahaa.

Wuxuu, dabadeed, iiga sheekeeyey dhawr sano ka hor inay saxiimad weyni la gaddoontay dadkii saarnaa oo ahaa toban iyo toddoba caddaan ahi intay hafashadii biyaha ka nabadgaleen ay ku degeen dalkooda, ilaa imminkana ay la nool yihiin tolkiis iyo qoonka uu ka dhashay.

Markaas baan weydiiyey, «Oo sidee bay tolkaa uga nabad galeen? Miyeysan cunin?». «Maya walaalahay ayey noqdeen, maxaa yeelay, dadkaygu waxay cunaan oo

keliya dadka ay dagaallada ka qafaashaan. Saaxiibbada ay nabadda yihiin marna ma cunaan oo cidina wax ma yeesho», ayuu iigu jawaabey.

## 9. XUSUUSTII DALKA

Sheekadaa iyadoo muddo dheer laga joogo ayaannu maalin maalmaha ka mid ah waxaannu fuullay buur dheer oo cirka ku tolan dhaladeed. Hawadu waxay ahayd mid aad u wanaagsan, markaas bay qaaraddii fogeyd ili ku wareertay nooga muuqatay, Jimcana mar alla markuu indhaha saaray oo uu hubsaday inuu dalkiisii yahay waxa u muuqday ayuu farax isla hayn waayey, oo boodbooday intuu codkiisu gaari karana ku dhawaaqay. «Alla farax weynaa? Alla raynrayn badanaa! Waaniga dalkaygii arka waa kaa dhulkaygii». Wejigiisii ayaa farax weyni ka muuqday, waxaana laga akhrisan karay astaamaha hilowga iyo jacaylka dhulkiisa. Markaas baan ku iri : «Ma jeceshahay inaad dalkaagii ku noqoto?» Markaas buu isagoo hilow la gubanaya iigu jawaabay :

«Allow yay, abbaanow, taasi u suuro gashaa!» Kolkaas baan ku iri : «Oo maxaad dalkaagii ka qabanaysaa? Ma jeceshahay inaad dugaagnimadaadii dib ugu noqotid oo aad dabeecaddii hore u laabatid, markaasna aad soo baxdo dad-qalad hilibka dadka cuna?».

Markaas buu si kalsooni leh igu yiri :

«Maya, Maya....... Jimce sidiisii hore marna ku noqon maayo, dadkiisana wuxuu uga qisoon doonaa sidii uu ku macaansadey rootida, caanaha, hilibka ariga iyo cuntada kale ee macaan, ma hilib dad baa! Jimce kaas wuu nacay, mana uu awoodo, cunid iska daaye, inuu xataa ku fekero, inuu wax la cuni karo yahay».

Kolkaas baan ku iri : «Haddii ay taas kugu ogaadaan adiga ayay ku cuni doonaan»! Suu wuxuu yiri : Maya, ha ka yaabin'i cuni maayaan. Waxayba iga baran doohaan si ay noloshooda u hagaajiyaan oo ay u macaansadaan cuntooyinka kuwa ugu wanaagsan».

Markaas baan weydiiyey: «Hadda ma jeceshahay inaad dalkaagii dib ugu laabatid?».

Isagoo muusoonaya ayuu ii jawaabay: «Ma kari karo inaan intaas oo bad ah dabaal ku gooyo».

Markaas baan u ballanqaaday inaan u diyaarin doono saxiimad dalkiisii gaarsiisa, isna wuxuu igu yiri : «Fiicnaan lahaydaa hadday taasi suuro gasho, waxaase shardi ah inaad socdaalkaas igu wehelisid. Waxaad arki doontaa sida ay dadkaygu jacayl iyo muxubbo kuugu soo dhoweeyaan. Ma jirto cid inay ku cunto ka fekeri doontaa, gaar ahaan haddii aan u sheego: Inaad adigu, geeri xun iga badbaadisay».

Wuxuu i jeclaysiiyo inaan dalkiisii u raaco oo uu iiga sheekeeyo sidii ay u wanaajiyeen kooxdii caddaanka ahayd ee berigaa hore u tagtay iyo siday u weheshadeen, dhaqankoodana ugu bogeen ayaan, ugu dambeystii, go'aan ku gaarey inaan socdaalkaas isu diyaariyo, anigoo ka rajo qaba inaan markaas ka dib dhulkeygii ku laabto.

## 10. MARKABKII SHIRAACA LAHAA

Waxa aad iigu xididdaystay fikradda fulinta niyaddaas qurxoon, markaas baannu aniga iyo Jimce, u ambabaxnay halkii ay saxiimaddaydii tiilley. Markaan wada fuullay ayaan ogaaday inuu Jimce iga xariifsan yahay oo iga adkaysi badan yahay, sida orodka saxiimadda loo labanlaabana igaga xeel dheer yahay. Markaas baan ku

iri: «Hadda ma kari kartaa inaad dalkaagii aaddid». Suu ye, «Saxiimaddaan yari socdaalkaas dheer uma bareeri karto». Kolkaas baan ku iri, «Waa inaynu, haddaba, sameynaa saxiimad middaan ka weyn oo aad dalkaagii ku tagtid. Markaas buu hoos u jeestay oo isagoo naxsan kana xun yiri: Muxuu Abbaankaygu iiga carooday? Muxuu Abbaankaygu isugu deyayaa inuu adeegihiisa Jimce iska fogeeyo?».

Saan waxaan ku iri, «Miyaadan jeclayn inaad dalkaagii ku laabatid?». Markaas buu yiri: «Haa haa, kasha iyo laabta ayaan taas ka jecelahay, waxaase shardi ah in aan kuugu ehel noqdo u noqoshada dalkayga».

Ma dhici karto inaan kaa tago oo aan keligey noqdo, maxaa yeelay, jacaylkaaga ayaa qalbigayga ka buuxsamay. Abbaankii wacnaayow, kii ay naxariistu ii buuxisayow, kii abaalka aan la gudi karin igu lahaayow!! Intii cabbaar ah ayaan iska dhigayey sidii nin ra'yigiisa ku adag, anigoo gacanta golxob ku wata. Wuxuu igu yiri, isagoo quus iyo naxdin buuxiyeen :

«Ilaah baan kugu dhaarshaye, golxabkan igu idil, noloshaan iiga raaxee, mar haddaad ku adkaysatay inaad Jimce dalkiisii u dhoofisid».

Markaas baan si aan leexleexad lahayn ugu muujiyey inaan socdaalkaas oggolahay, anigoo daacadnimadiisa tijaabiyey ,sida uu ii jecel yahayna aan ogaadey. Waxaan u ballanqaaday rajadii uu ku taahayey inaan u hirgelinayo oo aan dalkiisii u raacayo. Markaan ku goosannay inaanu socdaalkaas dheer ku dhaqaaqno waqti iskama aannu lumin. Geed weyn ayaannu googeyney, sidaannu habeen iyo maalinba hawshii ugu jirney ayaannu,

ugu dambeystii, bil ka dib sameynay saxiimad aad u weyn oo ballaaran.

Shan iyo toban beri ayaannu ku guuleysannay in aannu saxiimaddii badda dhigno, taasna dhibaatooyin aan la sheegi karin ayaannu kala kulannay. Laba bilood ka dibna waxaan sameynay shiraacii, dakhalkii, tabartayda oo dhanna waxaan isugu geeyey sidii aan «Jimce» ugu carbin lahaa socodsiinta markabkaas shiraaca leh, ilaa uu markii dambe si fiican uga soo dhalaalay.

Markab shiraac leh horey uma uu aqoon, weligiisna indho kama qaadin, maxaa yeelay, waxa keliya ee ay dadkoodu yiqiinneen waa huuriyaasha yaryar ee badda xoogga lagu jiirsiiyo ee shiraac iyo dakhal weligood ma ay maqal, umana ay baran. Sidaan wax u barayey ayuu awood yaab leh u yeeshay wadidda markabkaygii shiraaca lahaa, wax yar ka dibna wuxuu soo baxay naakhuude wax-yaqaan ah.

Sidaas baannu ugu diyaar garownay socdaalkii aannu dalkii «Jimce» ku tegi lahayn, wax naga dhimanaa oo qalab ahi ma ay jirin.

## 11. LADAGAALLANKII CADOWGA

Saddex sano ayaa markaas ka dib na soo dhaaftay. Jasiiraddii oo awel ii ahayd sidii meel la ii soo masaafuriyey waxaan hadda u arkaayey janno qurxoon oo doog badan. Waxaa ii wehel noqday «Jimce» daacadnimadiisii iyo jacaylkiisiina waxay ka adkaadeen dhibaato kasta oo nolosheyda wax u geysan karta.

Sannadkii lix iyo labaatanaad ayaa iigu soo galay, anigoo weli dhawraya dharaartii aan jasiiraddan ka lug bixi lahaa. Markay xilligii qaboobaha noqotay ayaannu

meel aammin ah saxiimaddii dhigannay inta ay na gudbayaan bilaha «Noofembar» iyo «Disembar». Markaas baannu is-diyaarin gallay oo socdaalkayga wixii naga kaalmeyn karaba heliddooda ku dadaallay.

Subax subaxyada ka mid ah annagoo hawshayadii si xoog leh ugu dhex jirna, Jimcana uu sidiisii, ugaarsigii diimanka ku maqan yahay ayuu isagoo ordaya i soo galay oo cabsi awgeed gariiraya, kuna dhawaaqaya:

«Abbaankaygiiyow, belaan arkay! Belaa dhacday!!!
Markaas baan weydiiyey :

«War waa maxay belada aad sheegaysaa? Suu ye: Saddex saxiimadood ayaa nagu soo aaddan oo xaggayaga u soo socda».

Waxaan ku dadaalay inaan dejiyo oo aan cabsida ka saaro, ha yeeshee, wixii aan ku lahaa oo idil dheg uma uu dhigayn. Wuxuu rumeysnaa kuwii colka u ahaa ee uu waagii hore ka baxsaday, inay u soo noqdaan oo keliya isaga baafintiisa. Waxaa ka dhaadhacsanayd inay jasiiradda isaga ka baadi goobayaan, dabadeedna intay hilibkiisa googooyaan ay dabka ku hogeystaan!

Markaas baan ku iri :

«Waryaa Jimcow fuleynimada iska daa oo geesi iska dhig. Cabsidu waxba kuu tari mayso, colkuna aniga iyo adiga ma ay kala jecla, midkeenna deyn maayaan haddii ay helaan. Waa inaynu dagaalkooda u diyaar noqonnaa. Dartaa ayaan wax walba madaxa u gashan doonaa ee adiguna wixii aan ku faro yeel. Waad arki doontaa sida aan rasaastayda ugu hurgufo oo huf iyo hal aan jirin uga dhigo».

Hadallada caynkaas ah sidii aan ugu wadey ayaan geesinnimadiisii u soo celiyey, markaas buu isna ku goostay inuu dhiirranaan kula dagaallamo, ilaa aannu ka adkaanno ama aan sharaf ku dhimanno.

Buur dusheed ayaan fuulay. Xoqaddaydii ayaan ku arkay kow iyo labaatan nin oo dab ololaya dul fadhiya. Intaan soo degtay ayaan Jimce ku iri, ii soo fiiri waxa ay samaynayaan. Wax yar ka dib ayuu soo noqday, wuxuuna ii sheegay nin ay soo qafaasheen oo ay rabaan inay hilibkiisa cunaan inay dabka ku hogeysanayaan. Markaas baan inta isagii kaxaystay keyntii xaggooda u dhaqaaqay oo geedihii waaweynaa isku dhex qarinnay ilaa aan colkii ku dhowaannay. Waxaan aragnay nin caddaan ah oo gar weyn leh, gacmaha iyo lugaha ka qabbiran, dhulkana yaal. Waan u kaadshey intii cabbaar ah, markay xariggii ka fureenna waxaan «Jimce» amar ku siiyey in uu xabbad rido mar alla markii aan anigu rido. Fili waa ayey igu noqotay markaan arkay Jimce oo keligii labo diley, saddexna dhaawacay. Anigu mid baan diley, labana waan dhaawacay.

Colkii markay hugunkii rasaasta maqleen ee ay arkeen waxa saaxiibbadood ku dhacay oo guuldarro ah ayey baqdeen oo amankaag ku dhacay, dabadeedna baf yiraahdeen. Iyagoo aan nabadgelyo ku tashanayn ayay labadoodii saxiimadood fuuleen, si ay dalkoodii ugu cararaan oo uga nabad galaan. Markaas baan ninkii caddaa u soo dhowaadey oo salaamay, isagoo geerida u janjeera. Intaan xariggii ka furay ayaan cunto iyo biyo siiyey ilaa uu soo miyirsadey, markaas buu ii mahad naqay oo aad iiga abaal sheegtay, ka dib baan ogaaday inuu Isbaanish u dhashay oo ay nasiib xumadiisu duullaanka baas gacan ta u gelisay.

## 12. JIMCE AABBIHIIS

Dagaalkii markuu dhammaaday ayuu «Jimce» arkay saxiimad ay cadowgii ka carareen kolkaasuu ii soo jeediyey inaan fuullo oo iyagii ku cayrsanno, cabsi iyo argagaxna ku beerro. Taas waan u guuxay, mar alla markaan u tagnayna waxaan ku dhex aragnay nin saddexaad oo la soo qafaashay. Intaan xarigga ka gooyey ayaan istaaji is-iri, mise kama kici karo. Taagdarro iyo cabsi ayaa geesaha u dhigay oo xooggii ka siibay.



Mar alla markuu Jimce ninkaas arkay ayuu ku dul dhacay oo shumis ku bilaabay, waxaana ka baqay farixiisii oo aad u darraa inuu waalli ku rido. Mar wuu ooyaa, mar wuu qoslaa, mar wuu boodaa, mar wuu cayaaraa, mar gacmihiisuu qaniinaa, mar wejiguu iska dharbaxaa, marna wuu heesaa. Intaas oo dhan waxaan ku dedaalayey inaan ka ogaado waxa uu la waayanayo ee ku dhacay, ha yeeshee, imaba maqleyn. Markii dambe ayuu inta in yar degey oo igu soo jeestay yiri : «Waxaad ogaataa inuu ninkani aabbahay yahay. Gacantaada ayaa Rabbi ku nabadgeliyey, maxaan u farxi waayey oo u boodboodi waayey!».

Anigoo la yaabban jacaylkaan wiilnimo ayaan faraxiisii u daayey, Jimcena si baarrinnimo leh ayuu aabbihiis u diirinayey oo lugaha uga tuujinayey. Ilaa uu xooggiisii u soo laabtay ayuu marna cunto ku qabanayey, marna uu waraabinayey. Markaas baan «Jimce» amar ku siiyey sidii uu aabbihiis u dhaqaaleynayey inuu ninkii Isbaanishka ahaana u dhaqaaleeyo, taasna markiiba wuu iga yeelay.

Kaddibna ninkii Isbaanishka ahaa iyo Jimce aabbihii waxaan ku qaadqaadnay rabar, maxaa yeelay, socod ma ay kari karin. Qalcaddii agteeda ayaannu buul uga dhisnay, midkood walbana waxaan u diyaarinnay kashkaash uu ku seexdo. Jimce ayaa ii noqday af-celiye wanaagsan oo ii soo gudbiya wixii uu aabbihii yiraahdo iyo wixii uu ku hadlo ninkii Isbaanishka ahaa ee isagu afka cadowgiis aad u yiqiinnay. Afkooda ayuu sidooda oo kale ugu hadli jirey, maxaa yeelay, muddo dheer ayuu la soo dhaqmayey, dhexdoodana ku noolaa.

Markaas baan «Jimce» amar ku siiyey inuu meydka wada aaso, si uusan u fuurin, urkooduna uusan cudur-

ro u dhalin, hawshaasna sidii la doonayey ayuu uga soo dhalaalay.

## 13. CARARKII CADOWGA KA DIB

Muddo dheer ayaannu kooxdayadii iska kaashanaynay sidii aannu dhulka u beeran lahayn, sidii aannu nolol fiican u heli lahayn, sidii aannu isku maaweeli lahayn, oo isu weheshan lahayn ilaa aannu kala qalo goyney oo giddi noqonnay saaxiibbo iyo jaallayaal aad isugu laab furan, isna jecel.

Maalin maalmaha ka mid ah ayaan «Jimce» aabbihiis ku iri : «Ma laga yaabaa inay colkii mar labaad nagu soo rogaal celiyaan oo ay halis na geliyaan». Markaas buu igu yiri, isagoo aad mooddo inuu waxa uu leeyahay hubo: Ha ka yaabin inay mar dambe dhibaatadii heshay u soo bareeraan una malayn maayo inay ka nabadgaleen duufaantii ku dhacday markay baqada jaanta wareen. Haddii ay ka nabad galeense u malayn maayo inay ku dhici karaan rogaalcelis kale. Rasaastii hugunkeedii ayey la waasheen ehelkooda iyo saaxiibbadoodna waxay uga sheekayn doonaan danabkii cirka kaga soo dhacay iyo onkodkii jaalleyaashood qaar ka mid ah nafta ka qaaday. Qaar iyagii ka mid ah ayaan maqlayey markey baxsanayeen iyagoo sheekaynaya oo ka fajacsan belaayada la soo deristay. Waxaa ka dhaadhici weydey awoodda ay colkoodu leeyihiin iyo sida ay uga suuro gashay inay meel fog kala diriraan oo ay duufaanno iyo onkodyo halis ah ku salladaan, si fududna u mariyaan».

Runtiina odaygii saadaashiisii dhab bay noqotay, maxaa yeelay, waagii ka dib ayaan maqlay inay cadawgii dadkoodii ku dhex faafiyeen markey hafashadii ka nabad

galeen warar ku saabsan duufaannadii aan roobka kaga dhignay. Intay wada baqeen oo Rabbi argagax ku tuuray ayay ku deysteen jinni iyo shaydaanno badani inay jasiiradda ka buuxaan, maalintii ka dibna way u soo hollan waayeen, iska daa cag ay soo dhigaane. Ha yeeshee, anigu waxaan isu diyaariyey inaan la dagaallami, muddo dheerna waxaan sugayey soo noqoshadooda ilaa aan hubsaday inaysan mar dambe soo laabanayn oo ay quusteen. Markaas bay xasillooni i gashay, kana fekeray sidii aan dalkaygii ugu noqon lahaa. Dhawr sano ayaa na dhaaftay, annagoo si nabadgelyo leh jasiiraddaas waaqlaha ah ugu nool, waxaana noo fududaatay wixii aan u baahnayn oo idil inaan ka sal gaarro annagoo iskaashanayna.

Dabadeed, ninkii Isbaanishka ahaa ayaan ka ogaadey saaxiibbadiisa ay qaraqa ka wada baxsadeen inay lix iyo toban yihiin qoryo badan iyo bastoolado ay haysteen, rasaas iyo baaruudse ay u la' yihiin. Waxay damceen inay dhulkoodii ku noqdaan, ha ahaatee, qalab la'aan awgeed ayey taasi ugu suuroobi weydey, markaas bay dhulkaas iska joogeen, isagoo aan raalli ka ahayn. Kolkaas baan ku iri: «Bareerahayga ma fulinayaan haddii aan qalabka safarka ka xil tiro oo aan anigu u diyaariyo». Kolkaas buu iigu jawaabay, «Alla taas waxay ka jecel yihiin ma jiraan».

Wuxuu ii soo jeediyey inuu «Jimce» aabbihiis kaxaysto oo iyagii u tago, markaas baan u oggolaaday, ka dib kolkuu iigu dhaar maray isaga iyo saaxiibbadiis inay amarradayda qaadan doonaan, iyagana uu ballan daacadnimo iiga soo qaadi doono inta aysan jasiiraddayada soo gelin. Waqti gaaban ka dib ayey Isbaanishkii iyo odaygii saxiimaddii cadowga fuuleen, markaan gacanta u geliyey wixii ay u baahnaayeen oo cunto iyo hub ah, waxaanna ugu duceeyey socdaal wanaagsan iyo soo-noqosho wacan.

# *Fasalka Siddeedaad*

## U NOQOSHADII DHULKEYGA

### 1. KEDISADII

Muddo siddeed maalmood ah ayaan sugayey soo-laabadkii odayga iyo ninkii Isbaanishka ahaa, ka dibna maalin maalmaha ka mid ah ayaa wax aanan filayn ila soo gudboonaadeen. Sidaan u hurdayey ayaan ku baraarugey Jimce oo afka qaylo ku shubtay, cod dheerna ku leh : «Abbaanow! Abbaanow! way noo soo dhawaadeen». Markiiba dharkaygii baan gashaday, waxaanna u orday halkaa iyo xeebtii. Baddii baan isha la raacay, kolkaas baan arkay saxiimad shiraac leh oo xagga jasiiraddayda afka ku soo haysa, hal mayl iyo barna noo soo jirta. Waxaan «Jimce» ku amray inuu korto oo uusan degdegin ilaa ay wax noo kala caddaanayaan. Ka dib waxaan ka dhaadhiciyey dadka saxiimadda ku jira inaysan ahayn jaalleyaashayadii aan aabbihiis iyo ninkii Isbaanishka ahaa soo wada ku niri ee miyeynaan imminka awoodi karin inaan ogaanno haddii ay col noo yihiin iyo haddii kale.

Buurtii fiinteeda ayaan tegey, xoqaddaydiina waxaan ku arkay doon taagan hilaadda labo mayl iyo bar.

Sida ay u dhisan tahay ayaan ka gartay inay doonyihii dalkayga tahay, dabadeedna waxaan hubsaday waqtigii aan qafaalashada ka baxsan lahaa inuu soo dhawaaday, waxaase faraxaygii iga soo dhex galay guuldarro iyo baas aan dareemay, maxaa yeelay waxa iga degi weydey waxay doontani ugu soo dhowaatay jasiiraddan fog, iyadoo la og yahay inaan soo mariddeeda loo baahnayn. Waxaa ila habboonaatay inaan korto ilaa aan runta ogaado oo wax waliba si fiican isugu kay muujiyaan.

## 2. EEDSHEEGADKII NAAKHUUDAHA

Saxiimaddii markay barroosinkii dhigtay ayaan dadkii la socdey tiriyey mise waa kow iyo toban reer dalkaygii ah, waxaana ka dhex muuqday saddex xirxiran oo la garbo duubay. Shan nin ayaa dabadeed xeebtii u soo boodday iyagoo dad ay soo qafaasheen hoggaan iyo xarko ku jiidaya. Wax baan garan waayey, si waxa aan arkayo aan ku fasirana waan soo dhufan waayey.

Markaas buur adeegihii «Jimce» igu yiri, «Shaki kuma jiro inay dadkaas ay soo qafaasheen cuni doonaan sida ay dadkayga yeelaan».

Si fiican baan uga dhaadhiciyey inaan taasi dhici doonin oo dil mooyee aysan dadkaas si kale uga aarsan doonin. Hase yeeshee, inay cunaan waa wax aan marna maskaxdooda ku soo dhici doonin».

In yar ka dib intay dadkii u xirxirnaa meeshoodii uga tageen ayay jasiiraddii tamashle u aadeen oo ilaa labadii duhurnimo dhex mushaaxayeen. Kulaylkii markuu darraaday oo ay qorraxdii ku dhegtay ayay dhulka isdaadsheen oo intay geedihii kaynta mid ka doorteen dug yiraahdeen.


Markaas baan kuwii garbo duubnaa u soo xambaartay oo weydiiyey waxa loogu daw galay. Kolkay indhaha iga

qaadeen ayey argagaxeen, ha yeeshee, ilaa ay cabsi gooyeen ayaan sasabayey, waxaana u muuqatay yididiiladii fakashadooda.

Mid ka mid ah ayaa igu yiri, isagoo xoog u ilmaynaya : «Anigu waxaan ahay naakhuudihii, raggaygii ayaa igu kacay oo igu caasiyoobey, waxayna ku goosteen inay jasiiraddan waaqlaha ah ee fogaanta badan iiga tagaan oo ii reebaan labadaan saaxiib ee iyagu diiday in ay kacaankooda iyo caasinnimadooda kala qayb galaan».

## 3. GUUSHII

Markaas baan ku iri: «Haddii aan guuldarradaan kaa saaro ma ballan qaadaysaa aniga iyo saaxiibkay «Jimce» inaad doonta ñagu qaaddo?».



Kolkaas buu yiri: «Haddii ay taasi suurogal noqoto wax walba waan kaa yeeli». Markaas baannu dejinnay qorshe aad u xeel dheer oo aannu caasiyiinta ku qabanno, saxiimaddoodana gacanta ugu dhigayno. Iyagoo

hurdadii ku jira, ayaannu ku kedinnay, aniguna waxaan gelinsiiyey inaan ciidan badan haysto. Kolkaas bay intoodii badnayd ku qasab noqotay inay is-dhiibaan, waxayna noogu ballan qaadeen inay noo daacad noqonayaan.

Cabbaar ka dib naakhuudihii, «Jimce» iyo saaxiibbadii ayaa doontii naakhuudaha iyo kuwii caasinnimada markii hore la qabanqaabiyey waxayna oodda ka qaadeen toddoba xabbadood oo ay madfacii doonta ka rideen, si ay guushooda u muujiyaan. Markaas baan farax isla hayn waayey wixii dhacayna rumeysan kari waayey. Gogoshaydii intaan isku tuuray ayaan hurdo dheer dhag iri.

Naakhuudihii ayaa, dabadeed, ii yimid oo isagoo dhabannada iga dhunkanaya igu yiri: «Doonta, naakhuudaheeda iyo bad-mareennadeedaba adiga ayay gacanta kuugu jiraan adiga amarkaagana way ku soconayaan, kuna joogsanayaan». Markaas baan hubsaday inaan baxsaday, waxaanna la dhacay farax i gilgilay, eray qura oo aan iraahdana waan garan waayey.

Cabbaar ka dib ayaan amankaaggii iyo yaabkii ka toosay, markaas baan naakhuudihii dhabannada ka shumiyey, anigoo sida ugu wanaagsan mahad ugu jeedinaya. Hadiyado qaali ah, cuntooyin macaan iyo dhar qurxoon ayuu doontii iiga soo rogey, waxyaalo kalena wuu i siiyey.

## 4. QALABKII SAFARKA

Waxaa noo harsanaa oo qura sidaannu safar isugu diyaarin lahayn. Taas ayaannu ku hawllanayn, waxaanuna goosannay inaannu jasiiradda uga dhaqaaqno qabqablayaashii fidmada u horseeday, si aysan fadqalallo kale noogu dhex beerin. Waxaan baray sida rootiga loo sameeyo, habka wax loo beerto iyo sida loo goosto, sida ca-

nabka loo qallajiyo iyo waxyaalo kale oo lagama maarmaan ah. Ka dibna waxaan u sheegay lix iyo toban nin oo Isbaanish ah inay ku soo aaddan yihiin maalmo tiro yar dabadeed, warqad dardaaran ahna intaan u qoray ayaan ballan iyo axdi adag ka qaaday, kuna dhaariyey in ay iskaashi iyo is-jeceyl ku wada noolaadaan.

Hub wixii aan haystay oo idil ayaan u dhaafay, shan bastooladood, saddex qori iyo saddex seefood, baaruud iyo rasaas wixii ii harayna fartaan ka saaray. Waxaan u faahfaahiyey sida ay riyaha u dhaqaalaysanayaan, siday caano uga maali lahaayeen iyo siday burcadka iyo farmaajada ugala bixi karaan.

## 5. CIIDDII DALKAYGA

Maalintii ku xigtay ayaan sagootiyey boqortooyadaas fogaanta badan, waxaanna qaatay cimaamaddeydii oo sidaan akhristaha u sheegay harag riyaad ka samaysnayd. Dalladaydii iyo shimbirtaydiina waan la tegey. Lacagtii aan haystay oo maaraysatayna waan urursaday.

Sagaal iyo tobankii «Disembar» sannadkii 1686kii ayay doontii nala dhaqaaqday, ka dib markaan jasiiraddan ku noolaa siddeed iyo labaatan sano, labo bilood iyo sagaal iyo toban beri. Ninkii «Jimce» ahaana aad buu ugu farxay inuu dalkaygii ii raaco, wax walbana saaxiibnimadayada iyo la socodkayga ayuu ka sarraysiiyey.

Waxaa la yaab lahayd maalintii aan jasiiraddan ka tegey inay ku beegantay maalintii aan ka baxsaday qafaalashadii aan akhristaha hadda ka hor uga soo sheekeeyey.

Kow iyo labaatankii bishii «Juun» sannadkii 1687kii ayaan magaalada «London» tegey, ka dib markaan shan iyo soddon sano ka maqnaa.

## 6. SOCDAALKII «LISBOONA»

Dalkaygii markaan imid ayaan nin qariib ah ku noqday, aabbahay iyo hooyadayna seben hore ayey aakhiro u jahaysteen. Qof qura oo i yaqaan lama kulmin, saaxiibbadaydii hore cid waan ka arki waayey, markaas baan ku goostay inaan «Lisboona» u dhoofo, si aan u helo cid iiga warranta waxa ay ku dambeysay tuuladaydii aan «Baraasiil» beri ku lahaan jirey. Si degdeg ah ayaan socdaalkaas «Lisboon» isugu diyaariyey, waxaana ila socday «Jimce», dabadeedna bishii «Abriil» ayaannu cagaha dhignay.

Nasiib wanaaggayga waxaan la kulmay naakhuudihii aan gacantiisa ku baxsaday berigii aan addoonsiga iyo qafaalashada ka cararayey. Intuu aad u qaboobey ayuu inan uu dhalay doontii u dhaafay. Sheekadaydii ayaan u mariyey, waxaanna weydiiyey bal wax uu ka og yahay tuuladii aan «Baraasiil» ku lahaan jirey, markaasuu ii sheegay inuusan sagaal sano dhulkaas war iyo wacaal toona ka haynin, ha yeeshee, uu had iyo goor raggaan shirkadda ahayn u ergayn jirey ama uu farriin u diri jirey ilaa ay aakhirkii u soo direen wixii mood iyo nool ahaa oo aan qaybta u lahaa.

Sidaas waxaan ku helay saami ii biiray oo iga soo galay beertii aan «Baraasiil» ku lahaa, kun ginina aan sannadkiiba ka yarayn, markaas baan naakhuudihii ugu deeqay abaalgud labanlaab ah, anigoo xusuusan samihii uu horay iigu galay iyo siduu iigu hawl galay intii aan maqnaa.

Markaas ka dib dhawr bilood ayaan yaabbanaa oo garan la'aa dal aan wejiga saaro ama aan beegsado, ha yeeshee, markii dambe waxay talo iigu idlaatay inaan Iglan abbaaro.

## DHAMMAADKII SHEEKADA

## GUULDARROOYINKII BERRIGA

### 1. Socdaalkii «Madrid»

Jidkii aan mari lahaa iyo waddadii aan ku socdaali lahaa ayaan intii beryo ah ka welwelsanaa, maxaa yeelay, dhoofka badda ayaan cabsi daran ka qabey, ka dib markaan halis iyo dhibaatooyin badan kala kulmay. Waxaa ii muuqatay inuu berrigu badda iiga roon yahay, iigana halis yar yahay, markaas bay iiga dhammaatay in aan «Madriid» afka saaro, anigoo maraya jidka dhulka ah ee «Faransa» gala. Waxa keliya ee markaas ii dhimmani waxay ku soo koobnaayeen anigoo masaafo gaaban ku gudba jidka badeed ee «Kaalee» iyo «Dover» u dhexeeya.

Socdaalkaas dheer waxaa igula jirey saaxiibbo ii wehel ahaa oo u qaybsanaa lix mudanayaal ah iyo shan adeege, mana aanaan kala harin ilaa aannu «Madriid» tagnay.

### 2. LABADII UUBATO

Qasab bay nagu noqotay inaanu «Madriid» ka ambabaxno, maxaa yeelay, xilligii qaboobaha ayaa soo dhowaadey. Waxaan ogaannay jidkii aannu mariddiisa ku tashannay inuu xilligan halis badan leeyahay. Qaboobuhu wuxuu ahaa xilli aad u dhaxan iyo gabadano badan, waxaanuna aragnay barafkii oo buurihii daboolay, markaas baannu ka qoomamaynay socdaalkayagan ee aannu waqaigaas xun ku beegannay.

Waxaase nala socdey garwade garaad badan oo geesi ah, maalmo badan sidaannu isaga dabo dhacaynayna waxaannu aakhirkii goyney dhul aad u ballaaran. Marmarka qaarkood ayuu garwaduhu na hormari jirey, dabadeedna gadaal buu noogu soo laaban jirey, si uu waddada runta ah noogu duwo.

Maalin maalamaha ka mid ah ayuu siday caadadiisu ahayd in cabbaar ah naga fogaaday, markaasay labo uubato daf soo yiraahdeen oo ku soo boodeen. Isna markuu arkay inay maanta nafi ugu dambeyso ayuu qaylo afka kushubtay, kolkaasuu «Jimce» ka gaarey oo labadii uubato middood xabbad afka uga riday oo intaysan garwadihii miciyaha gelin afka ciidda u geliyey. Uubatadii kalena kolkay aragtay waxa walaasheed ku dhacay ayey baqo jaanta wadhay oo cagta wax ka dayday.

## 3. WARAABE-DHUBBE

Markaas ka dib ayuu «Jimce» arkay wareebe-dhubbe lixaad weyn oo xaggayaga u soo malafsanaya, markaas bay cabsidayadii badatay. Hase yeeshee, ninkii «Jimce» ahaa ayaa ku jeesjeesay, wejigiisana waxaa nooga muuqday astaamaha faraxa iyo raynraynta. Show wuxuu aad u rabay inuu waraabaha la legdamo, markaasuu inta i soo eegay nagu yiri :

«Waxaan idinka codsanayaa inaydaan farxaddayda iga qalin daarin, maxaa yeelay, waxaan anigu, jecelahay inaan waraabahaas la kaftamo oo faduuliyo, si aan idiin maaweeliyo. Iska jira, nin xabbad ku ridaa yuusan jirin».

Kolkaas buu «Jimce» waraabihii madaxa dhagax kaga dhuftay, dabadeedna isagoo cartamaya ayuu ku soo farandulleeyey. «Jimcaa» geed dheer u fuulay, waraabihiina geedkii hoostiisa ayuu in yar istaagay, ka dibna wuu fuulay, markaasuu Jimce laamihii geedka middood ku dhegay oo si xoog leh u ruxruxay, isagoo ku jeesjeesaya waraabihii oo yaab ku dhacay intaasna hadba dhan u liicaya oo lalmanaya. Kolkuu in badan kaga cayaarsiiyey ayuu waraabe-dhuubihii dhegta xabbad uga tuujiyey oo halkii ku dilay, annaguna in badan baannu ku qosollay.

## 4. HABEEN BAAS

Habeenkii oo nagu soo dhow iyo dharaartii oo galbanaysa ayaannu aragnay, markaas baannu socdaalkii labanlaabnay, si aan u goyno masaafad gaaban ee noo ga harsanayd. togaggaas cabsida iyo argagaxa badan. Mar alla markay qorraxdii godkeedii gashay ayay shan uubato nagu soo baxeen, umase aannu dan gelin. Waxaannu ii biriqsi kasta diyaar u ahayn sidaannu isaga reebi lahayn uubatooyinka badan ee jidka naga heli doona, sidii uu garwaduhu noo sheegay.

Halkaas ka dibna markaannu qiyaasta afar kiiloomitir soconey ayaan aragnay uubatooyin badan oo [illegible] baqti ah hadiidaya, si xunna cadcad ugu [illegible]

Haddana markaannu cabbaar soconnay ayaan la kulannay uubatooyinkii oo qaylo iyo gurdan isku daraya oo dhagaha naga jebiyey. Waxaanu aragnay in ka badan boqol uubato oo na hareereeyey, diyaarna u ah inay nagu soo boodaan oo na hadiidaan. Rasaas baannu markaas oodda uga qaadnay, qaylana samadaannu gaarsiinnay, si ay u baqdaan.

## 5. SOCDAALLO KALE

Kolkaas bay dabada rogteen, mar dambena [illegible] soo dhowaan. Hadba waxay uubatooyin iyo bahallo kaleba nagu ciyaaraanba, ugu dambeystii annagoo daal badan qabna ayaannu «Kaalee» gaarnay, halkaas baannu socdaal aan dheerayn badda ku gudubnay, ka dibna «[illegible]lan» baannu tagnay.

Hadda nin gaboobay oo duq ah ayaan ahay, waxaanna soo maray sanooyin badan oo guuldarro iyo hoog leh. Hase yeeshee, waxaan ku tashanahay inaan hadda ku dhaqaaqo socdaallo kale oo kuwii hore ka dhaadheer. Waxaanse ogaaday inay fiican tahay inaynu cimrigeenna degganaan iyo rabsho la'aan ku dhammaysannaa in ay habboon tahay.